


"WAXAAN KU HUREEN HORAA LOO QABTAA"

Su'aalo & Jawaabo

Cutubka #1 #2 #3 #4

TAARIIKH

FORM 4



Su'aalo & Jawaabo

November 27, 2020

“WAARI MAYSIDEE WAR HAKAA HARO”
W/D: A++ GROUP



Su'aalo & Jawaabo

Cutubka #1 DAWLADDA CUSMAANIYIINTA

Caharka: 1^{aad} Aasaaskii Dowladda Cusmaaniyiinta

1. Sheeg qarniga ee soo ifbaxday imaarada yare ee kazoo ifbaxday galbeedka Turkiga?
 - ✓ Waa dhammaadka qarnigii 13^{aad}
2. Maxay isku badashay Imaaradii yareed?
 - ✓ Waxay isku badashay dawlad caalami ah.
3. Xaggee ayay kasoo bilaabatay Imaarad yar xaggee ayayna gaartay?
 - ✓ Waxay kasoo bilaabatay wabiga Danuub waxayna gaartay illaa iyo wabiga Furaat.
4. Dawladda Cusmaaniyiinta xaggee ayay kasoo ifbaxday?
 - ✓ Waxay kasoo ifbaxday deegaanka Thakuur.
5. Xilligee ayay dawladda Cusmaaniyiinta noqotay Dawlad Militari ah?
 - ✓ Waa xilligii Orkhaan
6. Xilligee ayay dawladdu Cusmaaniyiinta noqotay Boqortooyo caalami ah?
 - ✓ Waa xilliyadii Suldaan Al-Maxamed Al-faatix iyo Suldaan Suleyman Qaanuuni.
7. Qarnigii ayay Cusmaaniyiinta soo galeen Aasiyada yar?
 - ✓ Waxa ay soo galeen Qarnigii 13^{aad}.
8. Yay ahaayeen Cusmaaniyiinta?
 - ✓ Waxa ay ahaayeen qabiil ka mid ah qabiilooyinka dagga Turkiga.
9. Xaggee ayay kasoo barkaceen Cusmaaniyiinta?
 - ✓ Waxa ay kasoo barkaceen bartamaha Aasiya.
10. Xagge ayayna aaadeen Cusmaaniyiinta markii ay soo barkaceen?

- ✓ Cusmaaniyiinta waxa ay aadeen dhankaa iyo Anatooliya.
- 11.Yaa hogaaminaayay dawladda Cusmaaniyiinta markii ay soo barakacaayeen?
- ✓ Waxaa hogaaaminaayay Ardhagral.
- 12.Yay isgarab taageen Cusmaaniyiinta markii ayay soo barakaceen?
- ✓ Waxaa ay isgarab taageen Suldaan Calaa’udiin I Saljuuqi.
- 13.Suldaan Calaa’udiin muxuu abaalmarin ahaan u siisay Cusmaaniyiinta?
- ✓ Waxa uu u siisay gobol isaga raacsan oo ku yaal Waqooyiga Galbeed ee Anatooliya.
- 14.Maxay ay ahayd jagada uu Calaa’udiin siisay Ardhagral?
- ✓ Waxa uu siisay jagada ah ilaaliyaha Soohdimaha.
- 15. Ardhagraal xaggee ay xaruntiisu ahayd?
- ✓ Waxa ay ahayd Askii Shahar
- 16.Goormaa ayuu dhintay Ardhagral?
- ✓ Waxa uu dhintay Ardhagral 1288
- 17.Yaa xukunka kala wareegay markii uu dhintay Ardhagral?
- ✓ Waxaa kala wareegay wiilkiisa Cusmaan
- 18.Sheeg qaar ka mid ah meelaha uu qabsaday Cusmaan?
- ✓ Waxa uu qabsaday Cusmaan qaar ka mid magaalooyinka ugu muhiimsaneyd magaalada Buruusiya.
- 19.Maxaa sawab u ahaa inay burburto dawladda Saljuuqa.
- ✓ Waxaa sawab u ahaa weerar soo noqnoqday oo kaga yimaaday xaggaa iyo Maguulka.
- 20.Cusmaan markii uu ku dhawaaqay inuu madax banaanyahay muxuu isku magcaabay?
- ✓ Waxa uu isku magacaabay boqorka Aala Cusmaan?
- 21.Sheeg aasaasaha dhabta ah ee dawladda Cusmaaniyiinta?
- ✓ Waa cusmaan binu Ardhagral

22. Sheeg dhulalkii uu furtay Cusmaan?

✓ Waxa uu furtay dhulalkii Biizantiinka.

23. Sheeg dardaarankii ugu muhiimsanaa ee Cusmaan kaga tagay caruurtiisa iyo saaxiibadiisa?

✓ Dardaarankii ugu muhiimsanaa ee Cusmaan kaga tagay caruurtiisa iyo saaxiibadiisa waxa ay ahyd waxa uu ku yiri, “sii wada sarreynta diinta Islaamka kuna sii wada jihaadka Eebe dartii. Gacanta ku haysta astaanta sharafta leh ee Islaamka, idinka oo jihaadka ku dhameystiriya. Hadda iyo jeer u adeega diinta Islaamka, maxaayelay Eebaha qaadirka ah waxa sawab uga dhigay addoon daciif ah sideyda oo kale furushada dalal. Kusocda towxiidka illaa aad gaartaan dalalka ugu fog jihaadka ee Eebe dartii. Qofka tafiirtayda ka mid ah ee ka leexda xaq iyo cadaalada mahelayo shafeecada Rasuulka (NNKH) maalinta qiyaamaha. Wiilkeygow: addunkaan ma jiro qof aan dhimaneen, ajasheeduna waxa ay kusoo dhawaatay amarkii Eebe. Waxa aan kugu aaminay dowladaan, u cadaalad fal dhammaan arrimaha dadka”.

24. Sheeg naaneestii uu laha Cusmaan binuArdhagral?

✓ Waxaa loo yaqiinay Al Gaazi Cusmaan.

25. Sheeg goortii uu dhintay Cusmaan binu ardhagral?

✓ Waxa uu dhintay Agoosto 21, 1326dii.

26. Immisa sanno jir buu ahaa markii uu geeriyoonaaayay Cusmaan binu Ardhagral?

✓ Waxa uu ahaa 70 jir.

27. Maxay ahayd noloshee Cusmaan?

✓ Waxa ay ahayd jihad iyo dacwo Alle dartiis.

28. Markii uu dhintay Cusmaan yaa xukunka kala wareegay?

✓ Waxaa kala wareegay wiilkiisa Orkhaan.

29. Sheeg magaalada uu Orkhaan ka dhigtay magaalo madax?

✓ Waxa ay ahayd Magaalada Buursa.

30. Sheeg ninkii aasaasay ciidanka Inkishaariyada?

✓ Waa Orkhan

31. Yaa xukunka kala wareegay markii uu geeriyooday Orkhan?

✓ Waxaa xukunka kala wareegay Muraad

32. Yaa kala wareegay xukunka markii uu dhintay Muraad?

✓ Waxaa xukunka kala wareegay Maxamed 2aad.

33. Sheeg sanadkii uu xukunka qabsaday Maxamed ka 2aad?

✓ Waa sannadkii 1451dii.

34. Sheeg sannadkii uu Maxamedka 2aad furtay Magaalada Konistantanoobal.

✓ Maxamedka 2aad waxaa uu furtay Magaalada Konistantanoobal sannadkii 1453dii

35. Sheeg magaca kale ee loo yaqiinay Maxamedka 2aad?

✓ Waxaa loo yaqiinay Maxamed Al-faatix.

36. Sheeg sawabta Maxamedka 2aad loogu bixiyay magaca Maxamed Al-faatix?

✓ Maxaayeelay waxa uu ahaa ninkii furtay Magaalada Konistantanoobal.

37. Sheeg ninkii magca magaalada konistantanoobal u badalay Istanbul?

✓ Waa Maxamed Al-faatix.

38. Sheeg bilowgii dawladda Cusmaaniyiinta immisa marxal ayay soo martay?

✓ Waxaa ay soo martay labo marxaladood.

39. Maxaa ay ahaayeen labadii marxaladood ay soo martay dawladda Cusmaaniyiinta Bilowgeedii?

✓ labadii marxaladood ay soo martay dawladda Cusmaaniyiinta Bilowgeedii waxa ay ahaayeen:

- Marxaladda soo ifbixida Imaaradda iyo
- Heerka aasaaska boqrtooyada Caalamiga ah.

40. Sheeg mudadii ay sameesantay dawladda Cusmaaniyiinta?

✓ Waa mudadii u dhaxeesay 1299 illaa 1520kii.

41. Markii ay maguulka qabsadeed Baqdaad halkee ayay weerar ku qaadeen?
- ✓ Waxa ay weerar ku qaadeen dhulkii muslimiinta ee bariga.
42. Sheeg qaar ka mid ah astaamaha ay lahayeen Cusmaaniyiinta?
- ✓ Astaamaha ay lahayeen Cusmaaniyiinta waxaa ka mid ah: geesinimada iyo adeecida madaxa qabiilka.
43. Sheeg dhaqankii uu kula dhaqmay Cusmaan Raciyadii Masiixiyiinta?
- ✓ Waxa uu kula dhaqmayay siyaasad ku saleesan dulqaad iyo cadaalad.
44. Sheeg aasaasaha dowladda, gaar ahaan dawladda militariga?
- ✓ aasaasaha dowladda, gaar ahaan dawladda militariga waa Orkhaan.
45. Sheeg muddadii ay Cusmaniyyintu baaadi goobeen sidii ay u hoos keeni lahaayeen xukunkooda Carabta bari?
- ✓ Waa muddadii u dhaxeysay 1512-1520.
46. Sheeg magaca ninkii isku arkay in uu yahay ilaaliyaha muslimiinta?
- ✓ Waa Suldaan Saliim.
47. Sheeg sannadkii uu Suldaan Saliim jabiyay Safwiyiinta ee dagaalkii Jaldiiraan?
- ✓ Waa sannadkii 1514tii.
48. Sheeg sannadkii uu dhacay dagaalkii jaldiiraan?
- ✓ Waa sannadkii 1514tii.
49. Sheeg Suldaan Saliim xukunkiisa ku fidiyay masar?
- ✓ Waa sannadkii 1517tii.
50. Sheeg qaar ka mid meelaha uu Suldaan Saliim xukunkiisa ku fidiyay?
- ✓ Qaar ka mid ah meelaha uu Suldaan Saliim xukunkiisa ku fidiyay waa: Shaam, Al-jeeriya, Xijaaz, Yaman Tuniziya iyo Liibiya.
51. Yaa xukunka kala wareegay Suldaan Saliim?
- ✓ Waxaa kala wareegay Suldaan Suleyman Qanuuni.
52. Sheeg mudaddii uu xukunka haayay Suldaan Suleymaan Qanuuni?
- ✓ Waa mudadii u dhaxeysay 1520kii – 1566dii.

53. Sheeg sannadkii la furtay Bilgaraad oo ah irida bartamaha Yurub?

✓ Waa sannadkii 1521dii

54. Sheeg sannadkii la furtay jaziiradaha Roodes, Zabooliya iyo Buuda?

✓ Waa sannadkii 1522dii.

55. Sheeg sawabaha dhaliyay in ay burburto dawladda Cusmaaniyiinta?

- ✓ Sawabaha dhaliyay in ay burburto dawladda Cusmaaniyiinta waxaa ka mid ah:
 - Cadow farabadan oo ay dawladdu lahayd.
 - Ciidamada oo soo faragiliyay siyaasada.
 - Dowladda oo xoog u adeegsatay xallinta dhibaatooyinka.

Caharka: 2^{aad} Nidaamka Xukunka ee Dowladdii Cusmaaniyiinta

1. Sheeg micnaha loola jeedo erayga Khankaar?

✓ waxaa loo yaqaanaa madaxweynaha ama Suldaanka oo matalayo awoodda ugu sareysa dhanka siyaasadda iyo ciidanka

2. Sheeg erayga Khankaar waxa loogu yaqaano afka Turkiga?

✓ Waxaa loogu yaqaanaa Suldaanka weyn.

3. Sheeg erayga Baadshaa waxa loogu yaqaano afka Faariska?

✓ Waxaa loogu yaqaanaa taliyaha ugu sareeyo.

4. Suldaanka inta uu san tilaabo siyaasadeed yuu fatwo ka qaadan jiray?

✓ Waxa uu fadwo ka qaadan jiray Shiikha Islaamka.

5. Cusmaaniyuuntu way ka madax banaanaayeen maamulka dhexe sheeg sawabta?

✓ Maxaayeelay magaalooyinka waxa ay lahaayeen awood gudaha oo ah xagga dhaqaalaha, dib u aweenta booliska halka hay'ada fulinta uu madax ka ahaa Suldaanka.

6. Maxaa loola jeedaa Sadrul Acdam?

✓ Sadru Acdam waxaa loola jeedaa wasiirka koowaad.

7. Muxuu ahaa Sadru Acdam?

✓ Waxa uu ahaa la taliyaha suldaanka.

8. Xaggee ayuu ka imaanayay Sadru Acdam.

✓ Waxaa ka imaanayay muslimiinta xurta ah gaar ahaan reer Jandarlii.

9. Xaggee ayaa lagu tawa barijiray xubnihii Duusharma?

✓ Waxaa lagu tawabarijiray laguna barbaarinjiray barbarian askareed qasriga dhexdeeda.

10. Sheeg sannadkii ee korartay mas'uuliyadda Sadrul Acdam?

✓ Waa sannadkii 1654tii.

11. Sadru Acdam waxa uu lahaa xarun u gaar ah haddaba sheeg xaruntaas?

✓ Waa babul caalii (xarunta taliska)

12. Sheeg xarunta uu Sadru Acdam uu kulu wareegayay maamulka howlaha guud ee dalka ee ka socday qasriga Boqortooyada?

✓ Waa babul caalii (xarunta taliska)

13. Sheeg micnaha diiwaanka?

✓ Diiwaanka waxa uu la mid ahaa golo wasiiro oo la balaariyay.

14. Immisa ayuu ka koobanyahay diiwaanka hanaankiisa cusub?

✓ Waxa uu ka koobanyahay Sadru Acdam, wasiiro iyo mas'uuliyinta sare ee dawladda.

15. Immisa ayay ka kooban yihiin tiirarka dawladda Cusmaaniyiintaa?

✓ Waxa ay ka koobanyihiin garsoorayaasha, gudoomiyaasha gobolada, diiwanhayhaa, xisbiyada guud iyo taliyaha ciidamada.

16. Sheeg qaar ka mid ah awoodaha xafiiska ee dawladda Cusmaaniyiinta?

✓ Awoodaha xafiiska ee dawladda Cusmaaniyiinta waxaa ka mid ah: kormeerida xogheynta gaarka ee Sadru Acdam, qasnad hayaha, sharci dajiyayaasha, soo

saarista qoraalada maamulka iyo hubinta dhammmaan arrimaha quseeya dawladda.

17. Immisa maalmood ayuu xafiiska diiwaanka qabanjiray shirka?

✓ Waxa uu qaban jiray afar maalmood isbuucii.

18. Goormee ayay doodu bilaabanaysay goormaa ayay soo gabgawooweesay?

✓ Waxa ay bilaabanaysay subixii waxayna soo gabgawooweesay habeenkii.

19. Qof kasta oo cabasho qaba yuu u gudbin jiray cabashadiisa?

✓ Waxa uu u gudbin jiray cabashadiisa mas'uliyiinta diiwaanka.

20. Diiwaanka malaheen awood qaanuuni ah oo ku saabsan arrimaha lasoo gudbiyay go'aamada ay soo saaraan sawab?

✓ Sawbtoo ah ogolaanshaha Suldaanka ayaa shardi u ahaa flintaas.

21. Kooxda muhiimka ah ay ka jiray xafiiska waxaa ka mid ahaa aqoonyahano oo ka kooban xubnaha ugu muhiimsan heerarka xukunka haddaba kala sheeg xubnaha xafiiskaas?

✓ Waxay kala yihiin xubnaha xafiiskaas:

- Xafiiska hamaayuuni iyo
- Qasnadda boqortooyada

22. Yaa mas'uul ka ahaa xafiiska hamaayuuni?

✓ Waxaa mas'uul ka ah maamulka iyo isdhaafsiga warqadaha.

23. Yaa mas'uul ka ahaa qasnadda boqortooyada?

✓ Waxaa mas'uul ka ah maaliyadda iyo xisaabaadka.

24. Sheeg hay'ada ugu muhiimsaneed ee Cusmaaniyiinta?

✓ Waa hay'ada arrimaha maaliyada.

25. Immisa xisaabiye ayay bilowga nidaamka maaliyadeed ee lahayd dawladda Cusmaaniyiinta?

✓ Waxa ay lahayd labo xisaabiye.

26. Maxay kala ahaayeen labada xisaabiye ee lahaayeen dawladda Cusmaaniyiinta bilowgii nidaamka maaliyadeed?
- ✓ Waxa ay kala ahaayeen: mid Anatooliya joogay iyo mid Ruumli joogay.
27. Immisa xisaabiye ayaa jiray xilligii Suldaan Suleyman Qaanuuni?
- ✓ Waxaa jiray hal xisaabiye.
28. Sheeg magaalada ay xarunta u ahayd Suldaan Suleymaan Qaanuuni.
- ✓ Waxay ahayd Xalab
29. Sheeg magaca xisaabiyaha carabta iyo cajamta?
- ✓ Waa Suldaan Suleymaan Qaanuuni.
30. Immisa ayay gaaraysaa culeyska lacagta Cusmaaniyiinta?
- ✓ Waxa ay gaaraysaa 6 g oo u dhiganta rubuc dirham.
31. Sheeg astaamaha ay lahayd lacagta Cusmaaniyiinta?
- ✓ Astaamaha ay lahayd lacagta Cusmaaniyiinta waa:
- Wajiga horay waxaa ugu qornaa towxiidka.
 - Wajiga dambana magaca Amiirka Orkhaan.
32. Muxuu ku dhisnaa xukunka dawladda Cusmaaniyiinta?
- ✓ Xukunka dawladda Cusmaaniyiinta waxa uu ku dhisnaa shareecadda Islaamka.
33. Sheeg sannadkii la aasaasay qeyb ka mid madaafiicda culus ee dawladda Cusmaaniyiinta?
- ✓ Waa xilligii Suleymaan 1520kii illaa 1566.
34. Sheeg sannadkii Cusmaaniyiintu dhiseen ciidan badeed oo leh maraakiib?
- ✓ Waa sannadkii 1886dii.
35. Immisa ayay gaareeyeen tirada maraakiib ee dawladda Cusmaaniyiinta?
- ✓ Waxa ay gaaraayaan 300 maraakiib.

Caharka: 3^{aad} Salaadiinta ugu caansan Cusmaaniyiinta iyo

Waxqabadkooda

36.Sheeg aasaasaha imaarada Askuud?

✓ Waxa uu ahaa Cusmaan I.

37.Sheeg sawabta ay ku timid duulaankii ugu horeeyay ee dowladda Cusmaaniyyinta?

✓ Duulaankii ugu horeeyay ee dowladda Cusmaaniyyinta waxa uu ku yimid kadib markii ay burburtay dawladda Saljuuqi.

38.Sheeg sannadkii ay Buursa noqotay magaalo madaxda Cusmaaniyiinta?

✓ Buursa waxay noqotay magaalo madaxda Cusmaaniyiinta sannadkii 1302dii.

39.Sheeg labada jiho ee Cusmaan xukunkiisa ku fidiyay?

✓ Cusmaan waxa xukunkiisa ku fidiyay laba jiho, xagga Waqooyiga dhinaca wabiga Sakarya iyo Koonfur galbeed ee badda Marmarra.

40.Sheeg sannadkii uu Cusmaan gaaray himilooyinkiis?

✓ Cusmaan waxa uu gaaray himilooyinkiisa sannadkii 1308dii.

41.Sheeg sannadkii la furtay magaalada Afasis?

✓ Sannadkii la furtay magaalada Afasis waa 1308dii.

42.Sheeg duulaankii ugu danbeeyay ee uu Cusmaan qaaday?

✓ Duulaankii ugu danbeeyay ee uu Cusmaan qaaday waxa uu aha kii ka dhan ahaa magaalada Buursa.

43.Sheeg qaar ka mid ah xanuunadii uu lahaa Cusmaan?

✓ Xanuunadii uu lahaa Cusmaan waxaa ka mid ahaa: xanuunka kala qoyska xubnaha iyo qalalka.

44.Sheeg sannadkii Suldaan Orkhan uu xukunka Cusmaaniyiinta qabsaday?

✓ Waa sannadkii 1326dii.

45.Sheeg sannadkii uu Orkhan diray wiilkiisa iyo dhaxal sugihiisa Suleyman si ay ugu gudbaan marin biyoodka Dardaniil oo ay qabsadaan goobo ka mid ah galbeedka?

✓ Waa sannadkii 1358dii.

46. Markii uu Suleymaan ka gudbay marin biyoodka Dardaniil immisa nin ayaa la socotay?
- ✓ Waxaa la socotay 40 nin.
47. Sheeg qofkii ugu horeeyay ee qabsaday qalcadda Darnab?
- ✓ Waxa uu ahaa Suleymaan (dhaxalkasugaha Orkhan)
48. Sheeg halkii ay ku tiilay dakadii qalcadda Darnab?
- ✓ Waxa ay ku tiilay Koonfurta illaa Waqooyiga marin biyoodka Dardaniil.
49. Sheeg mid ka ah waxqabadkii ugu muhiimsanaa ee la xiriiray nolosha Orkhan?
- ✓ Waxaa ka mid ah dhismaha ciidan.
50. Sheeg sannadkii uu geeriyooday Orkhan?
- ✓ Waa sannadkii 1360.
51. Immisa sanno jir ayuu ahaa markii uu geeriyoonayay Orkhan?
- ✓ Waxaa uu ahaa 81 jir.
52. Immisa sanno ayuu xukunka hayay Orkhan?
- ✓ Waxaa uu hayay 35 sanno.
53. Immisa sanno jir buu ahaa Muraad I markii uu xukunka aabihiis kala wareegayay?
- ✓ Waxa uu jiray 36 sano.
54. Immisa sano ayuu xukunka hayay Suldaan Muraad I?
- ✓ Waxaa uu hayay 31 sanno.
55. Sheeg shaqadii ugu horeesay ee uu qabatay Muraad I?
- ✓ Waxa ay ahayd furitaanka magaalada Adraana ee Taraaqiya.
56. Sheeg Suldaankii ugu horeeyay ee isku magacaabay Khaliifka Muslimiinta?
- ✓ Waa Suldaan Muraad 1.
57. Sheeg sannadkii la furtay Adraana?
- ✓ Waa sannadkii 1561dii.

58.Muraad 1 markii uu furtay Adraana waa kuma Amiirkii usoo qoray warqad kasoo ugu hambalyeenayay guulihii uu gaaray?

✓ Waxa uu aha Amiirkii Karmiyaani (Kurdistaan).

59.Sheeg goobtii uu ku dhintay Muraad I?

✓ Waxa uu ku dhintay goob dagaal.

60.Sheeg sawabta keentay inuu dhinto Muraad I?

✓ Waxay ahayd Suldaanka asagoo joogo goobta dagaalka ayaa waxaa kusoo baxay askari Serbiyaan ah laakiin waxaa qabtay, ugu danbeyn wuu u yimid Suldaanka si uu ula hadlo wuxuu iska dhigay in uu rabbo in uu dhunkado gacanta suldaanka si dag dag ah ayuu ula soo baxay tooree sumeysan sidaas ayuu ku dhintay Suldaanka.

61.Kuma ayuu ahaa askarigii dilay Suldaan Muraad I?

✓ Waxa uu ahaa askari Serbiyaan ah.

62.Sheeg sannadkii uu geeriyooday Muraad I?

✓ Waa sannadkii 1391dii.

63.Sheeg sannadkii uu xukunka la wareegay Suldaan Maxamed I?

✓ Waxa uu la wareegay muddadii u dhaxeysay 1413dii illaa 1421dii.

64.Sheeg afarta wiil ee uu dhalay Maxamed I?

✓ afarta wiil ee uu dhalay Maxamed I waxa ay kala yihiin:

- Suleymaan
- Ciise
- Muuse
- Maxamed

65. Sheeg suldaankii ugu horeeyay ee shaaciyay ciidanka badda ee dawladda Cusmaaniyiinta?

✓ Waa Suldaan Maxamed I?

66.Sheeg magaalada madaxdii ugu horeysay ee Boqortooyadii Biizantiinka?

✓ Waa magaalada Konistantanoobal

67. Sheeg sannadkii la aasaasay magaalada Konistantanoobal?

✓ Waxaa la aasaasay sannadkii 330kii.

68. Sheeg qofkii aasaasay magaalada Konistantanoobal?

✓ Waxaa aasaasay Boqorkii Biizantiinka.

69. Sheeg sannadkii ay bilaaabatay go'doominta dhabta ah ee Konistanranoobal?

✓ Waa sannadkii 1453dii.

70. Sheeg caqabada ugu weyn ee haysatay ciidamada Muslimiinta?

✓ Caqabada ugu weyn ee haysatay ciidamada Muslimiinta waxay ahayd sidii maraakiibta joogtay dakada Boosfoorlagu wareejin lahaa dakada geeska dahabiga si loo suurto galiyo go'doominta qalcadda.

71. Sheeg sannadkii uu dhintay Maxamed Al-faatix?

✓ Waxaa uu dhintay May 3, 1481dii.

72. Immisa sanno ayuu jiray markii uu geeriyoonayay Maxamed Al-faatix?

✓ Waxa uu jiray 53 sanno.

73. Sheeg inta sanno ee uu xukunka hayay Maxamed Al-faatix?

✓ Waxa uu hayay 31 sanno.

74. Sheeg goortii la sameeyay Buundada loogu magac daray Maxamed Al-faatix ee ku tiilay Istanbul?

✓ Waa qarnigii 20^{aad}

75. Sheeg sannadkii uu Maxamed Al-faatix ku duulay Boolan iyo Faransiiska (Talyaaniga)?

✓ Waa sannadkii 1481dii illaa 1512dii.

76. Sheeg sannadkii uu dhacay dagaalkii Liibaanto?

✓ Waa sannadkii 1499kii.

77. Sheeg sannadkii uu Orkhaan Gaazi amar ku bixiyay in iskuul laga dhiso dhinaca masjidka weyn ee Azniiq?

✓ Waa sannadkii 1331dii.

78.Sheeg sannadkii dugsi laga aasaasay Buursa?

✓ Waa sannadkii 1335tii.

79. Sheeg sannadkii la aasaasay afarta iskuulka ee lagu barto xisaabta, caafimaadka iyo axaadiista?

✓ Waa 1557tii.

80.Sheeg magaca Injineerkii kormeeray Kuliyada Suleymaaniga markii ay dhamestirmatay dhismaha?

✓ Waa Injineerkii loo yaqiinay Sinaan.

81.Immisa shaqaalo ayaa ka shaqeenayay Kuliyada Suleymaaniga?

✓ Waxaa ka shaqeenaayay 3523 oo shaqaalo.

82.Halkee ayaa laga keenay qalabyada lagu dhisay kuliyada Suleymaaniga?

✓ Waxaa laga keenay Jasiiradda Buuzja, Izmiid, Gaza, Lubnaan iyo magaalooyin kale.

83.Immisa ayay u qaybsaneed Kuliyada Suleymaaniga?

✓ Waxay u qabsaneed 15 waaxood.

84.Immisa laamood ayay ka koobneed Jaamacada Suleymaaniga?

✓ Waxa ay ka koobneed iskuulka caafimaadka iyo isbitaal cuduradda maskaxda, iskuulka Axaadiista iyo Madbacad.

85.Sheeg meelaha uu ku fiday dhaqdhaqaaqa cilmiga ee guduha magaalooyinka Cusmaaniyiinta?

✓ Waxaa ka mid ah: Buursa, Adrina, Istanbul, Amaasiya iyo Sarejeefo.

86.Sheeg kuwa ugu muhiimsan dhaqdhaqaaqa cilmiga ee gudaha Turkiga manta?

- ✓ Kuwa ugu muhiimsan dhaqdhaqaaqa cilmiga ee gudaha Turkiga manta waa:
- Cilmiga xiddigiska.
 - Cilmiga juqraafiga.

- 87.**Maxaa lagu magacaabay ilaalaha gaarka ah ee laga aasaasay istaanbuul markii ay ay soo ifbaxday Dawladda Cusmaaniyiinta qarnigii 14^{aad}?
- ✓ Waxaa lagu magacaabay indho indheentii Toobhaani.
- 88.**Yaa maalgaliyay ilaalaha lagu magacaabay indho indheentii Toobhaani?
- ✓ Waxaa maalgaliyay Suldaan Muraad 3.
- 89.**Yaa gadoominaayay ilaalaha lagu magacaabay indho indheentii Toobhaani?
- ✓ Waxaa guddoominaayay Taqiyyudin Shaami.
- 90.**Immisa buuk ayuu qoray muddadaas Taqiyyudin Shaami?
- ✓ Waxa uu qoray in ka badan 30 buug oo kala ah xisaabta, xiddigiska iyo caafimaadka.

Caharka: 4^{aad} Sababihii Dhicitaanka Dawladda Cusmaaniyiinta

- 1.** Sheeg sababihii gudaha ahaa ee ka qeyb qaatay tabardaridda dawladda Cusmaaniyiinta?
- ✓ Sababihii gudaha ahaa ee ka qeyb qaatay tabardaridda dawladda Cusmaaniyiinta waxa ay ahaayeen:
- Heshiis la'aan ka dhexjirtay dadka, dadka ku hoos nool dawladda Cusmaaniyiinta iyo kala duwanaantooda, taas oo keentay in ay dagaalamaan, waana waxa tabardaridda u keentay dawladda Cusmaaniyiinta.
 - Ka fogaanshaha dawladda ay ka fogaatay diinta Islaamka.
 - Nidaamka xukunka oo noqday kaligii talisnimo kasoo awoodda oo dhan gacanta u galiyay hal qof oo ah Suldaanka oo ayna awoodiisana xadidneen.
 - Jahwareer dhaqaale iyo mid bulshadeed.
 - Suldaano ka leexday dariiqii toosnaa ee xukunka isaga dambeeyay: qarnigii 19^{aad}, waxaa talada isaga dambeeyay koox kali talis ah oo arxan daran laga

bilaabo Mustafa 4, Maxamuud 2, kadibna Cabdul majiid 1, kadibna Cabdul casiis, kadibna Muraad 5.

- Fiditaanka xisbiyo iyo dhaqdhaqaaqyo gooni goosadka mid qoomiyadeed ee dawladda illaa ay kaso muuqdeen inta badan goboladda dawladda.
- Ka qeyb galkii dawladda Cusmaaniyiinta dagaalkii 1^{aad} ee dunida waxa uu saameen weyn ku yeeshay tabardarrida iyo burburka waxaana sawab u ah ka qeyb qaadashada Cusmaaniyiinta ee dagaalkaas.

2. Sheeg sababihii dibada ahaa ee ka qeyb qaatay tabardaridda dawladda Cusmaaniyiinta?

- ✓ Sababihii dibada ahaa ee ka qeyb qaatay tabardaridda dawladda Cusmaaniyiinta waxay ahaayeen:
 - Jiritaanka xuquuq iyo mudnaan gaar ah oo loo fidiyay dalalka Yurub, taas oo horseeday in faragelin toos ah lagu sameeyo arrimaha Dawladda Cusmaaniyiinta.
 - Duullaankii gumeystaha waxa uu saameyn weyn ku yeeshay tabar darrida iyo burburka Dawladda Cusmaaniyiinta.
 - Soo bixitaanka awood kale oo ah Ruushka, taas oo gashay kaalinta Dawladda Cusmaaniyiinta, waxaana u sii dheerayd hurinta kacdoonno ay sameeyeen dadka Balkaaniska.
 - Guuldarrooyinkii soo gaartay ciidamadii Dawladda Cusmaaniyiinta, sababna u ahayd jiritaanka hubka cusub ee ciidamada Yurub iyo tabar darrida ciidanka Inkishaariyada ee qaababka dagaalka.

3. Dawladda Cusmaaniyiinta waxa ay gaartay dhammaadka maalmahoodii dambe xaalad tabar dari aad u daran maxaa sabab u ahaa?

- ✓ Waxaa sabab u ahaa ka qeybgalkii ay ka qeyb gashay dagaalkii 1^{aad} ee aduunka.

4. Sheeg sannadkii la riday dawlada Cusmaaniyiinta?

- ✓ Waa sannadkii 1924tii.

5. Sheeg suldaankii ugu danbeeyay ee dawladda Cusmaaniyiinta?

✓ Waa Suldaan Cabdi Xamiid 2.

Su'aalo & Jawaabo

Cutubka #2 QADDIYADO CASRI AH

Caharka: 1^{aad} Qadiyadda Falastiin

1. Waa immisa qaddiyahada ugu muhiimsan ee muslimiinta?
 - ✓ Waa saddex qaddiyadood.
2. Sheeg saddexda ka mid ah qaddiyaha ugu muhiimsan muslimiinta?
 - ✓ Qaadiyada falastiin
 - ✓ Qaddiyadda Kashmiir
 - ✓ Qaddiyadda Roohinga.
3. Xaggee ayay ku taalaa Falastiin?
 - ✓ Waxa ay ku taalaa dhanka Koonfur bari ee badda dhexe, waxa ayna ku teedsan tahay xeebta bari illaa daadegga Urdun, waana wejiga galbeed ee Shaaam.
4. Sheeg dalalka ee xudduuda la leedahay Falastiin?
 - ✓ Dalalka ee xudduuda la leedahay Falastiin waxaa ka mid: waqooyi waxaa ka xiga Suuriya iyo Lubnaan, koonfurna Masar iyo Badda Cas, waqooyina Urdun iyo galbeedna Badda dhexe.
5. Waa immisa bedka dalka Falastiin?
 - ✓ Bedka dalka Falastiin waa 27 kun km^2
6. Sheeg dadkii ugu horeeyay ee soo dagay dhulka Falastiin?
 - ✓ dadkii ugu horeeyay ee soo dagay dhulka Falastiin waxa ay ahaayen Kancaaniyiinta.

7. Sheeg muddadii u dhaxeesay ee kancaaniyiintu soo dagtay Falastiin?
- ✓ muddadii u dhaxeesay ee kancaaniyiintu soo dagtay Falastiin waa 3000-2500NCH.
8. Maxaa loola jeeda micnaha Kancaan?
- ✓ Waxaa loola jeedaa dhulka hoose, waxaana loo yaqiin dadka dagan dhulka dooxooyinka.
9. Sheeg macnaha loola jeedo Aaraam?
- ✓ Waxaa loola jeedaa Buuraha waxaana la oran jiray dadkii Aaraamta (buuraha).
10. Halkee ayuu ka yimid magaca Falastiin?
- ✓ Magaca Falastiin waxaa laga keenay dad ka yimid badda Lija ama jasiiradda Takriit ee Aasiyada yar, qarnigii labo iyo tobnaad dhexdiis, waxaa ayna dageen xeebaha, magacoodana waxa uu ugu qornaa qoraalladii Masaarida sidan (B L S T), waxa ayna gadaal ka raaciyeen xarafka N oo carabi ahaan loo adeegsado wadarta, sidaas ayayna isugu miimeen iyaga iyo kancaaniyiinta, magacooduna dhulka loogu bixiyay.
11. Sheeg qiblidii ugu horeesay ee Muslimiinta?
- ✓ qiblidii ugu horeesay ee Muslimiinta waa Baytul Maqdis.
12. Halkii salaadood oo lagu tukto Masjidul Aqsaas immisa salaadood ayay u dhigantaa?
- ✓ Halkii salaadood oo lagu tukto Masjidul Aqsaas waxa ayay u dhigantaa 500 salaadood oo lagu tugto meelaha kale.

13. Sheeg sannadkii uu Nabi Ibraahim uu dhulka Falastiin yimaaday?
✓ waa sannadkii 1900NCh.
14. Sheeg magaalada uu ku geeriyooday Nabi Ibraahim?
✓ magaalada uu ku geeriyooday Nabi Ibraahim waa magaalada Al-Khaliil.
15. Immisa caruur ayuu lahaa Nabi Yacquub ?
✓ Waxa uu laha 12 caruur.
16. maxaana loo yaqaanaa ilmaha Nabi Yacquub?
✓ Waxaa loo yaqaanaa Caruurtii Israa'iil.
17. Sheeg qarnigii la soo diray Nabi Muuse?
✓ Waa qarnigii 13^{aad} NCH.
18. Sheeg sannadkii ee jiilka cusub soo galeen dhulka Falastiin?
✓ Waa sannadkii 1190 NCH.
19. Sheeg sannadkii uu Nabi Daa'uud magaala madaxda u wareejiyay Qudus?
✓ Waa sannadkii 995 NCH.
20. Ilaa iyo intee sanno ayuu Nabi Daa'uud xukumayay Qudus?
✓ Waxa uu xukumayay ilaa 963 NCH.
21. Sheeg sannadkii uu geeriyooday Nabi Suleymaan?
✓ Waxa uu geeriyooday sannadkii 923 NCH.
22. Sheeg laba qeybood ee u kala qeybsanetay boqortooyadii Nabi Suleymaan?

- ✓ Waxa ay u kala qeybsantay boqortooyadii Falaastiin iyo Boqortooyadii Qudus.
- 23. Sheeg sannadkii ee Aashuuriyiintu qabsadeen Boqortooyada waqooyi ee Falastiin?
 - ✓ Waxa ay ka qabsadeen sannadkii 721 NCH.
- 24. Sheeg sannadkii Baabiliyinta gacanta u gashay Qudus?
 - ✓ Waa sannadkii 586 NCH.
- 25. Sheeg magaca hogaamiyihii Baabiliyiinta?
 - ✓ magaca hogaamiyihii Baabiliyiinta waa Nabuukhad Nasar.
- 26. Sheeg sannadkii ee Falastiin oo idil gacanta u gashay Faarisiyiinta?
 - ✓ Waa sannadkii 539 NCH.
- 27. Sheeg sannadkii uu Roomaanka joojiyay in Falastiin ee soo galeen ama ee sii joogaan Falastiin?
 - ✓ Waa sannadkii 135tii.
- 28. Sheeg qarnigii ee Yurub kasoo baxday dhaqdhaqaaq diimeed oo ah madhabta Barootestanka?
 - ✓ Waa qarnigii 16^{aad}.
- 29. Sheeg sannadkii uu soo baxday buugii uu qoray qareenkii Ingiriiska ahaa Heneri Finish?
 - ✓ Waa sannadkii 1621dii.
- 30. Muxuuu ku saabsanaa buugii uu qoray qareenkii Ingiriiska ahaa ee Heneri Finish?
 - ✓ Waxa uu ku saabsanaa soo noqoshada Israa'iil.

- 31.** Sheeg sannadkii uu qoray Isxaaq Niyuutun buugii ku saabsanaa so noqoshadii Israa'iil?
- ✓ Waa sannadkii 1643-1727dii.
- 32.** Sheeg sannadkii uu qoray Jaan Jaak Ruusoo buugii ku saabsanaa so noqoshadii Israa'iil?
- ✓ Waa sannadkii 1712-1778dii.
- 33.** Sheeg sannadkii uu qoray Joosef Biristeli buugii ku saabsanaa so noqoshadii Israa'iil?
- ✓ Waa sannadkii 1733-1804dii.
- 34.** Sheeg sannadkii shirweynihii ugu horeeyay ee lagu qabtay magaalada Baasil ee Iswiisar Laan?
- ✓ Waa sannadkii 1897dii.
- 35.** Yaa hogaaminaayay shirweynihii ugu horeeyay ee lagu qabtay magaalada Baasil ee Iswiisar Laan sannadkii 1897dii?
- ✓ Waxaa hogaaminayay Weriye Thiyuudor Harsal.
- 36.** Sheeg sannadkii lasoo saaray balanqaadkii bilfoor?
- ✓ Waa sannadkii 1917dii.
- 37.** Sheeg sannadkii ay Yuhuudu gaartay tiradoodu 55 Kun qof oo u dhiganta 8%?
- ✓ Waa sannadkii 1918dii.
- 38.** Sheeg sannadkii ay Yuhuudu gaartay tiradoodu 646 Kun qof oo u dhiganta 32%?
- ✓ Waa sannadkii 1948dii.

39. Sheeg sannadkii Ingiriisku u oggolaaday tallaabadii uu ku fulin lahaa hoggaaminta siyaaasadeed ee Falastiin?
- ✓ Waa sannadkii 1922dii.
40. Sheeg sannadkii Qaramada midoobay soo saartay go'aankii lagu kala qeybinaayay Falastiin oo in ka badan kala bar la siiyay Suhyuuniyadda?
- ✓ Waa sannadkii 1947dii
41. Sheeg goortii lagu dhawaaqay dawladda Israa'iil?
- ✓ Waxaa lagu dhawaaqay dawladda Israa'iil 14kii May 1948
42. Sheeg Go'aan Lambarka qeexaya in ay Falastiin xaqa u leeyihiin in ay ku soo laabtaan dhulkooda iyo in magdhaw la siiyo qaxootiga Falstiin?
- ✓ Waa Go'aan Lambarka 194/1948dii.
43. Sheeg Go'aannada Lambarrada qeexaya in Israa'iil laga codsaday in ay ka baxdo dhulka ay heysato Falastiin.
- ✓ Waa Go'aannada Lambarka 242/1967, 338/1973.
44. Sheeg Go'aanka qeexaya in Israa'iil laga codsaday in ay joojiso deegaannada cusub ee ay ka dhiseyso Falastiin.
- ✓ Waa Go'aanka 1334/2016

Caharka: 2^{aad} Qadiyadda Kashmiir

- i. Halkee ayay ku taalaa Kashmiir?

- ✓ Waxa ay ku taalaa Waqooyiga Fog ee Qaaradda Hindiya aagga koonfureed ee Aaasiyada dhexe.
- ii.** Waa immisa dawladdaha ee Kashmir la leedahay Soohdimaha?
 - ✓ Waa afar dawladdood.
- iii.** Sheeg afarta dawladdood oo ay Kashmir la leedahay Soohdimaha?
 - ✓ afarta dawladdood oo ay Kashmir la leedahay Soohdimaha waa: Shiinaha, Afgaanistaan, Bakistaan iyo Hindiya.
- iv.** Waa immisa baaxada dhulka Kashmir?
 - ✓ Waa 240 kun km^2
- v.** Immisa ayay gaarayaan tirada dadka ee ku nool Kashmir?
 - ✓ Waxa ay gaarayaan 12 milyal.
- vi.** Immisa boqolkiiba ayaa Muslimiin ka ah dadka ku nool Kashmir?
 - ✓ Waxaa ka ah 80%.
- vii.** Sheeg immisa ay Hindiya, Bakistan iyo Shiinaha ay ka heystaan dhulka Kashmir?
 - ✓ Hindiya waxa ay ka heysataa dhul dhan 65%, Bakistaan 30% iyo Shiinaha oo isna haysta 5%.
- viii.** Maxay Kashmir u tahay Hindiya, Bakistaan iyo Shiinaha?
 - ✓ Waxa ay u tahay goob istaratiji, difaac iyo ammaanka.
- ix.** Sheeg muhiimada Kashmir ay u leedahay Hindiya?
 - ✓ Waxa ay xayndaab uga tahay falsafadda Bakistaan eek u dhisan diinta.

- Madax banaanideeda waxa ay furaysaa albaab xiran oo aan la xakameyn Karin kaasoo hortaagan gobollo ku kala duwan diin, isir iyo luqad.
- Jiritaanka gobol uu dadkiisu u badan yahay muslimiin, waxa uu xoojinayaa falsafadda xukunkeeda ee Calmaaniga ah.

Sheeg muhiimada Kashmiir ay u leedahay Bakistaan?

✓ Waa meesha ay ka soo baxaan saddex webi oo halbowle u ah nolosha Bakistaan.

- Waa il laga helo dad saldhig difaac u ah waqooyiga Bakistaan.
- Waxa ay xoog dadeed oo muslimiin ah u tahay gobolka Bunjaab.

x. Sheeg xilligii uu Kashmiir soo gaaray diinta Islaamka?

✓ Waa qarnigii 1aad ee Hijriga gaar ahaan sannadkii 90 ee Hijriyada.

xi. Sheeg sannadkii Jalaalu diin Akbar ku daray Hindiya Kashmiir?

✓ Waxay ahayd 1587dii

xii. Sheeg sannadkii uu Ingirisku qabsaday Hindiya?

✓ **Waa sannadkii 1819kii.**

xiii. Sheeg goortii ee Hindiya heshay madax banaanideeda?

✓ Waa bishii Luulyo 1947dii

xiv. Sheeg sannadkii uu Qaramada midoobay uu sooo dhexgalay dagaalkii u dhaxeeayay Hindiya iyo Bakistaan?

✓ Waa sannadkii 1949kii.

xv. Sheeg goortii uu dhacay dagaalkii ugu horeeyay ee u dhaxeeyay Hindiya iyo Bakistaan?

✓ Waa sannadkii 1949kii.

xvi. Sheeg xabad joojinta uu Qaramada midoobay uu dhex dhigay Hindiya iyo Bakistaan?

✓ Shuruudaha xabbad joojinta waxa ay ahayd sidan:

- In labada ciidan ay dib ugu noqdaan goobohoodii hore.
- In xiriirkii caadiga ahaa la soo celiyo.
- In la xalliyo dhibaataada qaxootiga.
- In la sii daayo maxaabiista la kala haysto.
- In daciaayadaha la joojiyo.

xvii. Sheeg dagaalkii labaad ee u dhaxeeyay Hindiya iyo Bakistaan goortuu dhacay?

✓ Waxa uu dhacay sannadkii 1965tii.

xviii. Sheeg sannadkii ee u guuleysatay Hindiya in qeybta bari ee Bakistaan ay ka gooyso?

✓ Waa sannadkii 1971dii.

xix. Dawladee ayaa aasaasantay markii ay dawladda Hindiya ee ku guuleysatay in qeybta bari ee Bakistaan ay ka gooyso?

✓ Waxaa aasaasantay dawladda Bangaladeesh.

xx. Sannadkee ayay aasaasantay dawladda Bangaaladeesh.

✓ Waxay aasaasantay sannadkii 1971dii.

xxi. Goormee dhacday xabad joojintii labaed ee u dhaxeysay Bakistaan iyo Hindiya?

✓ Waxa ay dhacday sannadkii 1972dii.

xxii. Sheeg qaar ka mid ah go'aamadii ay soo saartay Qarama midoobay eek u saabsana Qaddiyadda Kashmir, in dadku ay si dimuqaraadi ah u soo bandhigaan rabitaankooda iyo afti xor ah?

✓ Waxaa ka mid:-

- In ciidamadu ay dib uga gurtaan Kashmir.
- In la sameeto xukuumad ku meel gaar ah oo xaaladda la socoto.
- In la qaado afti guud ee dadweyne.

xxiii. Sheeg qodobadii ee soo bandhigtay Qaramada midoobay ee lagu xallinayo qaddiyada Kashmir?

✓ Qoddobada waxaa ka mid ah:-

- In labada dhinac ay maamulaan Kashmir.
- In afti loo qaado aaya ku talinta Kashmir.
- In Qaramada Midoobay ay dawladnimo gaarsiiso Kashmir.
- In la kala qaybiyo Kashmir soohdin caalami ahana la dhex dhigo.

Caharka: 3^{aad} Qadiyadda Ruhinga

1. Maxaa loo yaqiinay Miyamar markii horay?

✓ Waxaa loo yaqiinay Barnaamiya.

2. Halkee ayay ku taalaa Miyamar.

- ✓ Waxa ay ku taalaa soohdimaha u dhaxeeya dad kala haysta dhaqamada Hinduuska, Konfuushiyuuska iyo Buudismaha.
- 3. Sheeg sannadkii ee Miyamar Hindiya?
 - ✓ Waxa ay ka go'day sannadkii 1937dii.
- 4. Sheeg magaalo madaxda Miyamar?
 - ✓ Magaalo Miyamar waa Raanguun
- 5. Sheeg bedka Miyamar?
 - ✓ Bedka Miyamar waa 680 kun km^2
- 6. Sheeg tirada dadka Miyamar?
 - ✓ Tirada dadka Miyamar waa 60 milyan.
- 7. Waa immisa boqolkiiba dadka Miyamar ee ah Muslimiinta?
 - ✓ Boqolkiiba dadka Miyamar ee ah Muslimiinta waa 20%.
- 8. Immisa ayay ka yihiin dadka Miyamar gobolka Aarakaanna?
 - ✓ Gobolka Aarakaanna waxa ay ka yihiin 70%.
- 9. Sheeg dalalka ay Miyamar Xuduud la leedahay?
 - ✓ Miyamar waxaa waqooyi bari xuduud la ah Shiinaha, waqooyi galbeedna Hindiya iyo Bangaaladeesh, koonfurtana xeebta gacanka Bangaal iyo bedweynta Hindiya.
- 10. Sheeg dalka labaad ee ugu saboolsan Aasiya?
 - ✓ dalka labaad ee ugu saboolsan Aasiya waa Miyamar.
- 11. Immisa ayaa ah beeraley dadka Miyamar?
 - ✓ Dadka Miyamar waxaa beeraley ah 43%.
- 12. Maxaa ugu badan dalagooda dadka Miyamar ku nool?

- ✓ Waxaa ugu badan ay beerteen waa bariis.
- 13. Sheeg sannadkii Baarma ay qabsatay gobolka Aarakaan ee ku darsatay gobolladeedii 14ka ahaa?
 - ✓ Waa sannadkii 1784tii.
- 14. Sheeg xilligii uu Islaamku soo gaaray Myanmar?
 - ✓ Waa qarnigii 2aad ee hijriyada.
- 15. Sheeg boqorkii ugu horeeyay ee gobolka Aarakaan?
 - ✓ Waa Suleymaan Shaah.
- 16. Immisa sanno ayuu talada hayay Suleymaan Shaah?
 - ✓ Waxa uu talada hayay 48 sanno.
- 17. Sheeg sannadkii uu Ingiriisku qabsaday gobolka Aarakaan?
 - ✓ Waxa uu qabsaday sannadkii 1848dii.
- 18. Sheeg sannadkii ee soo ceshetay Baarma gobolka Aarakaan?
 - ✓ Waxa ay soo ceshetay sannadkii 1948dii.
- 19. Yay yihiin Ruhingaha?
 - ✓ Ruhinga waa dad muslimiin ah oo ku dhex nool dawladdan ku taal koonfurta bari ee Aasiya.
- 20. Maxay ku hadlaan dadka Ruhingaha?
 - ✓ Waxa ay ku hadlaan luqada Ruhinga ha, oo ka geddisan afafka looga hadlo gobollada Myanmar.
- 21. Sheeg sannadkii loo diiday dhalashada dadka Ruhingaha?
 - ✓ Waa sannadkii 1982dii.

22. Sheeg sannadkii ee Baarma xasuuqeen dad gaaraya 30 kun oo Muslimiinta Ruhingaha ah?
- ✓ Waa sannadkii 1938dii.
23. Sheeg sannadkii ee Baarma xasuuqeen dad gaaraya 100 kun oo Muslimiinta Ruhingaha ah?
- ✓ Waa sannadkii 1942dii.
24. Sheeg sannadkii ee ciidmada Baarma la wareegeen talada dalka Miyanmar?
- ✓ Waa sannadkii 1962dii.
25. Sheeg sannadkii ee soo bilaabatay qaddiyada Miyanmar?
- ✓ Waa sannadkii 1784tii.
26. Maxay ahaayeen tallaabooyinka uu raacayay gumeysiga Ingiriiska si uu uga hortago awoodda Islaamka?
- ✓ Tallaabooyinka uu raacayay waxaa ka mid:-
- Muslimiinta oo laga ceyriyo shaqooyinka, laguna beddelo Buudiyiin.
 - Dhulalka iyo hantida muslimiinta oo lala wareego, loona qeybiyo Buudiyiinta.
 - Muslimiinta oo xabsiyada loo taxaabo, qaarkoodna la masaafuriyo.
 - Machadyada iyo dugsiyada islaamiga ah oo la xiro, laguna wareejiyo Buudiyiinta.
 - Buudiyiinta oo loo fasaxo in ay xasuuqaan muslimiinta.

27. Sheeg sannadkii ay Baarma ka qaadatay madax-bannanideeda dalka Ingiriiska?
✓ Waa sannadkii 1937dii.
28. Sheeg sannadkii la aasaasay urur diineed oo Buudiste xagjir ah in uu ka hortago lana dagaalamo Islaamka?
✓ Waa sannadkii 1999dii.
29. Sheeg sannadkii Qaramada Midoobay ee soo saartay go'aan oo ay ku guubaabinaya xukumadda Miyanmaar, in ay Muslimiinta Ruhinga kala mid dhigto kooxaha kale?
✓ Waa daba-yaaqadii sannadkii 2014tii.
30. Sheeg sannadihii Qaramada Midoobay sheegtay in muslimiinta Aarakaan gaar ahaan Ruhingaha, ay la kulmayaana faquuqid dhinaca diinta, waxbarashada iyo bulshada?
✓ Waa sannadihii 2013-2014.
31. Sheeg xoghayihii guud ee Qaramada Midoobay ee sannadkii 2016?
✓ Waa Koofi Anaan.
32. Sheeg sannadkii Koofi Anaan u hor kacay gudi la tashi ah ee ay soo magacaabay haweeneyda la taliyaha u ah dawladda Miyanmaar?
✓ Waa sannadkii 2016dii.
33. Sheeg sannadkii uu Koofi Anaan ee warbixinta guddiga u gudbiyay xarunta Miyanmaar ee ka dhanka xad gudubka Ruhingaha?
✓ Waa sannadkii 2017dii.

34. Sheeg sannadkii ciidamda Miyanmar lagu eedeeyay in dil iyo kufsi wadareed ay u geysteen Ruhingaha?
- ✓ Waa sannadkii 2017dii.
35. Sheeg xilligii golaha ammaanka uu meel marin u waayay baaq uu Ingiriisku soo jeediyay oo ku saabsanaa in la sameeyo guddi calaami ah oo soo baara dhabta xad gudubyada?
- ✓ Waa xilligii bishii Maarso 2017dii.
36. Sheeg sannadkii xoghayihii guud ee Qaramada Midoobay uu Golaha Ammaanka u soo jeediyay in la joojiyo rabshadaha Aarakaan?
- ✓ Waa sannadkii bishii Sebeterember 2017dii.
37. Maxay Qaramada ku tilmaamtay waxa loola kacayo Ruhingaha?
- ✓ Waxa ay ku tilmaamatay Isir sifeen haddana uusan ahayn isir sifeyn.
38. Sheeg qaar ka mid ah qodobada sheegaya in isir-gooyntu ay tahay falal lagula kaco koox dal, qawmiyad, isir iyo diin iyadoo looga danleeyaha in gebi ama qeyb ahaan loo burburiyo?
- ✓ Waa qodobada soo socda:-
- Xubnaha kooxda oo la laayo.
 - Xubnaha kooxda oo jir ama maskax ahaan dhibaato weyn loogu geysto.
 - Si ula kac loogu geysto kooxda xaalad nololeed keeni karta burbur dhaqaale gebi ahaan ama qeyb ahaan.

- La qaado tallaabooyin looga hortegayo taranka kooxda dhexdeeda.
- Caruurta kooxda oo si qasab ah loogu wareejiyo kooxo kale.

Su'aalo & Jawaabo

Cutubka #3 XILLIGII SOOMAALIDU KA TALINAYSAY DALKEEDA

Caharka: 1^{aad} Xilligii Dawladdnimo Gaarsiinta Soomaaliya

1. Sheeg sannadkii ee Soomaaliya heshay madax-banaanideeda?
 - ✓ Waxay heshay madax-banaanideeda 1 Luulyo 1960kii.
2. Sheeg labada hab maamul ee xilligii Soomaalidu ka talinaysay dhulkeeda?
 - ✓ labada hab maamul ee xilligii Soomaalidu ka talinaysay dhulkeeda waa:
 - Hab maamulkii rayidka iyo
 - Hab maamulkii ciidanka.
3. Sheeg inta sanno uu socday hab maamulkii rayidka?
 - ✓ Hab maamulkii rayidka waxa uu socday 1960-1969kii.
4. Sheeg inta sanno uu socday hab ciidanka?
 - ✓ Hab maamulkii ciidanka waxa uu socday 1969-1991kii.
5. Sheeg waxa loola jeedo dawladdnimo gaarsiinta?
 - ✓ Dawlaaddnimo gaarsintu waa qaab ka mid qaababkii ay curiyeen dawladdihii ku adkaaday dagaalkii labaad ee aduunka.
6. Sheeg sannadkii Qaramada Midoobay ee sameesay habka dawladdnimo gaarsiinta?
 - ✓ Waa sannadkii 1945tii.
7. Muxuu qeexayaa qodobka 72aad ee Qaramada Midoobay?
 - ✓ Qodobka 72aad ee Qaramada Midoobay waxa uu qeexayaa in maamulo gobollo la doonayo in ay ka madaxbanaanaadaan dawladdihii gumeysan jiray kuwaasi oo loo diyaarin in ay isku filnaadaan siyaasad ahaan, dhaqaale ahaan iyo bulsho ahaanba, aayahoodana ka tashadaan.

8. Sheeg waxa ku cad qodobka 77aad ee xeerarka Qaramada Midoobay?
- ✓ Qodobka 77aad ee xeerarka Qaramada midoobay waxaa ku cad in habka dawladnimo gaarsiinta la hoos geeyo qaybaha soo socda:
 - Gobolladii lagu maamuli jiray habkii hoosgeynta.
 - Gobollo laga soo gooyay dawladaha cadawga kadib dagaalkii 2aad ee dunida.
 - Gobollo doonistooda lagu hoosgeynayo cidda mas’uul ka nqonaysa maamulkooda.
9. Sheeg sannadkii ay Qaramada Midoobay ay baabi’isay heshiiskii dawladnimo gaarsiinta ee gobolkii ugu dambeeyay kaasoo ah Jasiiradda Balaa?
- ✓ Waa sannadkii 1994tii.
10. Mar haddii aanan jirin gobollo ku haray gacanta golaha dawladnimo gaarsiinta, ayaa waxaa la laalay hawlihiisii. Haddaba sheeg sawabta?
- ✓ Waa sannadkii bishii Nofember 1994tii.
11. Sheeg sannadkii Koonfurta Soomaaliya la hoos geeyay habka dawladnimo gaarsiinta ee Qaramada midoobay?
- ✓ Waa sannadkii 1941dii.
12. Sheeg dalalka loo xil saaray in ay kormeeraan Talyaaniga habsami u fulinta heshiiskii dawladnimo gaarsiinta Koonfurta Soomaaliya?
- ✓ Waa dalalka: Masar, Filibiin iyo Kolombiya.
13. Sheeg sannadkii ay golaha dawladnimo gaarsiinta Qaramada Midoobay ee ansixisay heshiiska dawladnimo gaarsiinta Soomaaliya?
- ✓ Waa sannadkii Bishii Janaayo 1950kii.
14. Sheeg qodobada uu qorayo heshiiska dawladnimo gaarssinta ee Soomaaliya?
- ✓ qodobada uu qorayo heshiiska dawladnimo gaarssinta ee Soomaaliya waxaa ka mid:-

- in la horumariyo arrimaha siyaasadda, bulshaduna ka qeyb gasho maamulka si loogu diyaariyo bulshada gobolka in ay is maamulaan.
- In la kobciyo dhaqaalaha gobolka, lana hormariyo bulshada, iyadoo la dhawrayo dhammaan xuquuqda.
- In la horumariyo adeegyada guud sida caafimaadka iyo waxbarshada?
- In la dhiso gole la tashi oo maamulka kala tashado arrimaha dalka.
- In la dhiso ciidan qaran iyo ciidan boolis ah si loo sugo amniga.

15. Sheeg sannadkii uu Talyaanigu kala wareegay Ingiriiska Koonfurta Soomaaliya?

✓ Waa sannadkii Bishii April 1950kii.

16. Goormee ayay ansixisay Qaramada Midoobay heshiiskii Dawladdnimo gaarsiinta Soomaaliya?

✓ Qaramada Midoobay waxa ay ansixisay heshiiskii Dawladdnimo gaarsiinta Soomaaliya sannadkii Bishii Disember 1950kii.

17. Goormee ayay ku ekeed dawladdnimo gaarsiinta ee dalka Soomaaliya?

✓ dawladdnimo gaarsiinta ee dalka Soomaaliya waxa ay ku ekeed Bishii Disember 1960kii.

18. Goormee ayuu Xaakimka guud ee Talyaaniga uu la kulmay xisbiyada siyaasadeed iyo hoggaan diineedka?

✓ Xaakimka guud ee Talyaaniga waxa uu la kulmay xisbiyada siyaasadeed iyo hoggaan diineedka 15kii Abriil.

19. Goormee ayuu Xaakimka guud ee Talyaaniga uu la kulmay hoggaanka dhaqameedka?

✓ Xaakimka guud ee Talyaaniga waxa uu la kulmay hoggaanka dhaqanka 17kii Abriil.

20. Immisa xubnood ayuu ka koobnaa gole tashiga ee la dhisay, immisa ayaana ka aheed Soomaali gola tashiga?

- ✓ Gole tashiga waxa uu ka koobnaa ee la dhisay 35 xubnood oo 28 ka mid ah ay Soomaali yihiin?

21.Immisa ayuu ahaa muddo xilliyeedka Golaha tashiga?

- ✓ Muddo xilliyeedka ee golaha tashiga waxa uu ahaa hal sanno (1 sanno).

22.Yaa guddoomin jiray golaha tashiga?

- ✓ Golaha tashiga waxaa guddoomin jiray Xaakinka guud ama Xoghayihiisa

23.Goormee ayuu furay Xaakinka guud Kalfadhigii 1aad ee golaha?

- ✓ Xaakinka guud waxa uu furay Kalfadhigii 1aad ee golaha Bishii Janaayo 1951dii, isaga oo ka turjumaya ka qeyb galka talada dalka.

24.Kumuu ahaa muddanihii ugu horeeyay ee ka hadla golaha tashiga hortiisa?

- ✓ Muddanihii ugu horeeyay ee ka hadla golaha tashiga hortiisa waxa uu ahaa C/raxmaan Cali Ciise.

25.Muxuu yiri C/raxmaan Cali Ciise markii uu ka hor hadlayay golaha tashiga hortiisa?

- ✓ C/raxmaan Cali Ciise waxa uu yiri, “ Waxa aan nahay Soomaali waa in aan ka shaqeynaa danaha Soomaaliyeed”.

26.Goormee ayuu dhammaaday Kalfadhigii 1aad ee golaha tashiga?

- ✓ Kalfadhigii 1aad ee golaha tashiga waxa uu dhammaaday Oktoobar 1951dii.

27.Immisa fadhi ayuu kulmay golaha tashiga?

- ✓ Golaha tashiga waxa uu kulmay 49 fadhi.

28.Maxaa lagu tilmaami karaa 49kii fadhi oo uu kulmay golaha tashiga?

- ✓ 49kii fadhi ee uu kulmay golaha tashiga waxaa lagu tilmaami karaa in uu ahaa tallaabo horay loo qaaday.

29.Xilligii golaha 2aad ka hor maxaa loo qeybin jiray kuraasta golaha?

- ✓ Xilligii golaha 2aad ka hor waxaa loo qeybin jiray kuraasta golaha qaab beeled.

30. Xilligii golaha 2aad maxaa laga dhigay badalka kuraasta golaha oo loo qeybin jiray qaab beeled?
31. Badalka kuraasta golaha in loo qeybiyo qaab beeled waxaa laga dhigay qaab degaan Juqraafi iyo xisbiyo siyaasad ku salaysan.
32. Immisa ayaa la gaarsiisay xubnaha golaha xilligii golaha 2aad, immisa ayaana Soomaalina ka aheed?
33. Xubnaha golaha waa la kordhiyay waxaana la gaarsiiyay 44 xubnood oo 32 ka mid ah Soomaali yihiin.
34. Goormee ayay ku beegneed xilligii golaha 3aad?
- ✓ Xilligii golaha 3aad waxa ay ku beegneed bilowgii 1953dii.
35. Maxaa bilowday xilligii golaha 3aad?
- ✓ Xilligii golaha 3aad waxaa bilowday Soomaaliyaynta shaqada.
36. Maxay ahayd su'aashii uu soo jeediyay Mudane Cali Shiddo Cabdi?
- ✓ Su'aashii uu soo jeediyay Mudane Cali Shiddo Cabdi waxay ahayd, “waxa an rabaa in aan wax ka ogaado qorshaha maamulka ee ku aaddan Soomaaliyaynta Xafiisyada dawladda iyo habka dhaqaale iyo kan sharci ee shaqaalaha Soomaaliyeed”.
37. Yaa loo magacaabay guddoomiyaha degmada Diinsoor?
- ✓ Guddoomiyaha degmada Diinsoor waxaa loo magacaabay Sheekh Munye.
38. Goormee ayaa loo magacaabay Sheekh Munye guddoomiyaha Diinsoor?
- ✓ Bishii May 1953dii Sheekh Munye ayaa loo magacabay guddoomiyaha degmada Diinsoor.
39. Goormee ayuu golaha yeeshay laba guddoomiye ku xigeen oo Soomaali ah?
- ✓ Waxa uu yeeshay laba guddoomiye ku xigeen oo Soomaali ah golaha Bishii May 1953dii.
40. Yaa loo magacaabay hawl-wadeen ka tirsan xaakimka guud xilligaas?

- ✓ Dr Maxamed Sheekh Axmed Gabyow ayaa loo magacaabay hawl-wadeen ka tirsan xaakimka guud
- 41.**Goormee ayuu ku ekaa xilligii golaha 3aad?
- ✓ Xilligii golaha saddexaad waxa uu ku ekaa Disember 1953dii.
- 42.**Muxuu ahaa xeerka golaha 3aad uu soo saaray Lambarkiisa, maxaana lagu xaddidayay?
- ✓ Golaha 3aad waxa uu soo saaray xeerka Lr 168 oo lgau xaddiday in la qabto doorashooyinka golayaasha degaanka.
- 43.**Goormee ayay ahayd markii lasoo saaray xerka Lr 168 oo lagu xaddiday la qabto doorashooyinka golayaasha degaanka?
- ✓ Waxa ay ahayd Bishii Maarso 1954tii.
- 44.**Immisa degmood xubnaha dalka ayuu ka koobnaa xilligii golaha 3aad uu soo saaray xeer Lr 168 oo lagu xaddiday la qabto doorashooyinka golayaasha degaanka bishii Maarso 1954tii?
- 45.** Waxa uu ka koobnaa 35 degmo.
- 46.**Maxaa hirgelay golihii 4aad xilligiisa?
- ✓ Golihii 4aad xilligiisa waxaa hirgelay doorashadii ugu horeesay in la qabto iyo tallaabo kale oo ahayd sameynta calanka?
- 47.**Yaa soo hindisay Calanka Soomaaliya?
- ✓ Waxaa soo hindisay Calanka Soomaaliya Mudane Maxamed Cawaale Liibaan.
- 48.**Muxuu yahay midabka Calanka Soomaaliya?
- ✓ Midabka calanka Soomaaliya waa midabka Cirka oo Buluuga ah, ayna ku dhex taal xiddig shan gees leh oo cad.
- 49.**Maxay tilmaameesaa xiddigta shanta gees leh oo cad ku dhextaal calnka Soomaaliya?

- ✓ Xiddigta ku dhextaal calanka Soomaaliya waxa ay tilmaameysaa shanta Soomaaliyeed.

50.Goormuu ayuu ahaa xilligii golaha 5aad?

- ✓ Xilligii golaha 5aad waxa uu ahaa 1955tii.

51.Maxaa la go'aamiyay xilligii golaha 5aad 1955ti?

- ✓ Xilligii golaha 5aad 1955tii waxaa la go'aamiyay in golaha laga dhigo gole sharci dejin ah.

52.Immisa ayaa la gaarsiiyay xubnaha golihii 5aad, immisa ayaana Soomali ka aheed?

- ✓ Waxaa la gaarsiiyay 70 xubnood oo 60 ka mid ah Soomaali yihiin.

53.Immisa heer ayay noqotay doorashada xilligii golaha 5aad markii xubnihii la kordhiyay oo la gaarsiiyay 70 xubnood oo 60 ka mid ah Soomaali yihiin?

- ✓ Waxa ay noqotay laba heer.

54.Maxay ahayd laba heer ay noqotay doorashada xilligii golaha 5aad?

- ✓ Laba heer waxa ay kala ahaayeen:-

- I. Doorasho toos ah, oo dadku ay ku doortaan golayaasha degaanka laga diiwan geliyay.
- II. Doorasho aan toos ahayn oo dadka reer guuraaga ah ee aan la diiwan gelin ay wax ku dooranayeen.

55.Goormee ayaa la qabtay doorashooyinka xilligii golihii 5aad?

- ✓ Waxaa la qabtay bishii Maarso 1956dii.

56.Immisa kursi ayay heleen Xisbiga SYL doorashooyinkii bishii Maarso 1956dii?

- ✓ Xisbiga SYL waxa ay heleen 43 kursi oo ka mid ah 70kii kursi.

57.Yaa loo doortay guddoomiyaha sharci dejinta kadib doorashooyinkii la qabtay bishii Maarso 1956dii?

- ✓ Guddoomiyaha sharci dejinta waxaa loo doortay Mudane Aadan Cabdulle Cusmaan.
- 58.**Yaa loo magacaabay Ra’iisul wasaare dejinta kadib doorashooyinkii la qabtay bishii Maarso 1956dii?
- ✓ Waxaa Ra’iisul wasaare loo magcaabay Mudane Cabdullaahi Ciise Maxamuud.
- 59.** Goormee ayaa la dilay Kamaaluddiin Salaax?
- ✓ Kamaaluddiin Salaax waxaa la dilay 16kii Abril 1957dii.
- 60.**Muxuu ahaa Kamaaluddiin Salaax markii la dilayay?
- ✓ Kamaaluddiin Salaax waxa uu aha Safiirkii Masar ku metelayay golihii la tashiga ee Qaramada Midoobay.
- 61.**Intee loo qaaday meydkiisa Kamaaluddiin Salaax markii uu dhintay?
- ✓ Waxaa meydkiisa loo qaaday Kamaaluddiin Salaax magaalada Qaahira
- 62.**Yaa soo qaabilay wafdigii la socday meydkiisii Kamaaluddiin Salaax markii la geeyay magaalada Qaahira?
- ✓ Waxaa soo qaabilay Madaxweyne Jamaal Cabdinaasir wafdigii Soomaaliyeed ee la socday meydkiisii waxa uuna ku yir, “ Masar waxaa jooga 27 malyan oo dhammaantood diyaar u ah in ay u dhintaan xornimada iyo madax-bannaanida Soomaaliya”.
- 63.**Maxaa loogu magic daray Kamaaluddiin isaga oo lagu qadarinayo dadaalkiisii?
- ✓ Waxaa loogu magic daray mid ka mid ah jidadka caasimadda Mugdishu.
- 64.**Goormee ayuu go’aamiyay golaha sharci dejinta in la dhiso ciidan qaran?
- ✓ Sannadkii 1958dii golaha sharci dejinta waxa uu go’aamiyay in la dhiso ciidan qaran.
- 65.**Goormee ayuu go’aamiyay golaha sharci dejinta in la baabi’iyo wax kasta oo hor taagan dhismaha ciidan qaran xukuumaddana awood u siiyay fulinta go’aankaas?

- ✓ Bishii Febraayo 1960kii ayaa golaha dejinta go'aamiyay in la baabi'iyo wax kasta oo hor taagan dhismaha ciidan qaran xukuumaddana awood u siiyay fulinta go'aankaas.
- 66.**Goormee ayaa la dhisay ciidanka xoogga dalka Soomaaliyeed?
- ✓ Waxaa la dhisay ciidan xoogga dalka Soomaaliyeed 12kii Abriil 1960kii
- 67.**Kumuu ahaa jeneraalkii ugu horeeyay ee loo magacaabay taliya Ciidanka xooga dalka Soomaaliya.?
- 68.**Jeneral Daa'uud Cabdulle Xirsi ayaana loo magacaabay Taliyaha ciidanka xoogga dalka.
- 69.**Goormee ayuu ku ekaa golaha sharci dejinta 1aad muddo xileedkiisii?
- ✓ Golaha sharci dejinta 1aad muddo xileedkiisu waxa uu ku ekaa 1958dii.
- 70.**Muxuu soo saaray golihii sharci dejinta 1aad oo muddo xileedkiisu ku ekaa 1958dii?
- ✓ Waxa uu soo saaray xeerka doorashooyinka dalka oo qoraya in doorashadu noqoto qof iyo cod, dumarkana xaq u siiyay in ay wax dooran karaan lana dooran karo.
- 71.**Immisa xubnood ayuu gaarsiiyay xubnaha golaha sharci dejinta 2aad golihii sharci dejinta 1aad?
- ✓ Waxa uu gaarsiiyay 90 xubnood oo dhammaantood Soomaali ah.
- 72.**Doorashooyinkii la qabtay xilligii golaha sharci dejinta 2aad immisa xubnood ayay ku guuleysatay Xisbiga SYL?
- ✓ Xisbiga SYL waxa uu ku guuleystay 83 xubnood oo ka mid ah 90kii xubnood.
- 73.** Goormee ayay ahayd xilligii xubno golaha sharci dejinta ka tirsan soo jeediyeen in xilliga madax-bannaanida laga soo hormariyo xilliga loo asteeyay, oo uu goluhu si wadar ah ku aqbalay?
- ✓ Waxa ay ahayd Bishii Agoosto 1959kii.

74. Yaa kasoo qeyb galay kulankii golaha sharci dejinta Soomaaliya ee la qabtay bartimihii Bishii Jannaayo 1960kii.
- ✓ Waxaa kasoo qeyb galay xoghayaha guud ee Qaramada Midoobay Daag Hamarshold.
75. Muxuu Daag Hamarshold xoghayaha Qaramada Midoobay ka hor yiri golaha sharci dejinta hortooda markii uu kasoo qeyb galay kullankii?
- ✓ Waxa uu ka hor yiri, “ Qaramada Midoobay waxa ay si loo dhan yahay u oggolaatay codsigiinna, waxay u go’aamisay una xaddiday in 1^{da} Luulyo 1960ka ay noqoto maalinta madxa-bannaanidiina, waana maalin ay dhawr bilood uun naga xigto, kadibna Soomaali waxay xubin ka noqon doontaa Qaramada Midoobay”.
76. Goormee ayay midoobeen gobollada Waqooyi iyo kuwa Koonfureed?
- ✓ Waxa ay ku midoobeen 1^{da} Luulyo 1960kii.

Caharka: 2^{aad} Xilligii hab maamulka Rayidka

1. Kumuu ahaa xubinta ugu da’da weyn Barlamaankii midnimada?
 - ✓ xubinta ugu da’da weyn Barlamaankii midnimada waa Xaaji Bashiir Ismaaciil.
2. Maxaa loo doortay xubinta ugu da’da weyn oo ah Xaaji Bashiir Ismaaciil?
 - ✓ Xubinta ugu da’da weyn oo ah Xaaji Bashiir Ismaaciil waxa loo doortay
3. Markii Ra’iisul wasaare loo doortay Cabdirashiid Cali Sharmaake yuu guddoomiye Barlamaan u soo doortay?
 - ✓ Waxa uu u soo doortay Jaamac Cabdullaahi Qaalib.
4. Sheeg goortii afti dadweyne oo loo qaaday dastuurka dalka oo lagu ansixiyay 905 oggolah?
 - ✓ Waa Bishii Juun 1961dii.

5. Sheeg muddo xilliyeedka uu xilka hayay Aadan Cabdulle Cusmaan (Aadan Cadde) ?
 - ✓ Waa 6 sano ah.
6. Sheeg goortii ee dalka ka qabsoomtay doorashooyin lagu soo doortay xildhibaanada baarlamaanka oo gaaraya 123 xubnood?
 - ✓ Waa bishii Maarso 1964tii.
7. Kumuu ahaa Halyeygii Xalane?
 - ✓ Maxamed Cabdulle Xalane waxa uu ahaa Laba Xiddigle ka tirsan Ciidan Xoogga Dalka Soomaaliyeed.
8. Sheeg goormuu dhacay dagaalkii ugu horeeyay ee u dhaxeeyay Itoobiya iyo Soomaaliya?
 - ✓ Waxa uu dhacay sannadkii 1964tii.
9. Intee ayuu dhufays kaga jiray Halyey Xalane dagaalkii ugu horeeyay ee u dhaxeeyay Itoobiya iyo Soomaaliya?
 - ✓ Waxa uu dhufays kaga jiray Magaalada Tog Wajaale.
10. Maxaa uu meel fog ka arkay Halyey Xalane markii ay dib usoo guranaayeen?
 - ✓ Waxa uu meel fog ka arkay Calanka oo ka lulanaya goobtii ay ka soo baxeen.
11. Muxuu Xalane kula dardaarmay saaxiibadiis inta uu dhiman ka hor?
 - ✓ Waxa uu kula dardaarmay hadalladaan waddaniyadda xambaarsan isagoo leh, “ Cadowgu bir ma aha ee burburiya, ilaashada dhulkiina iyo calankiina”.
12. Sheeg goortii Ra’iisul wasaare loo magacaabay Cabdirisaaq Xaaji Xuseen?
 - ✓ Waa Bishii Juun 1964tii.
13. Muxuu kusoo xushay Cabdirisaaq Xaaji Xuseen xukumadiisa markii uu soo dhisaayay?
 - ✓ Waxa uu ku soo xushay karti, khibrad iyo hufnaan, halka xukumadihii hore lagu soo xuli jiray awood qaybsi beeled.

14. Muxuu ahaa go'aankii uu soo saaray Ra'iisul wasaare Cabdirisaaq markii uu ogaaday in uu maamulka xukuumadda hareeyay musuq-maasuq?
- ✓ Go'aankii uu soo saaray Ra'iisul wasaare Cabdirisaaq waxa uu ahaa Baqshadda Guduudan.
15. Sheeg sannadkii uu Ra'iisul Wasaare Cabdirisaaq Xaaji Xussen baneeyay Xafiiskiis?
- ✓ Waxa uu baneeyay sannadkii 1967dii.
16. Ma hirgeliyay riyadiisii Ra'iisul Wasaare Cabdirisaaq Xaaji Xussen markii uu baneenayay xafiiskiis?
- ✓ Maya ma uusan hirgelin.
17. Sheeg sannadkii madaxweyne loo doortay Cabdirashiid Cali Sharmaake?
- ✓ Waa Bishii Juun 1967dii.
18. Markii la doortay Cabdirashiid Cali Sharmaake yuu Ra'iisul-wasaare u soo magacaabay?
- ✓ Waxa uu Ra'iisul-wasaare u soo magacaabay Maxamed Xaaji Ibraahim Cigaal.
19. Sheeg sannadkii Maxamed Xaaji Ibraahim Cigaal loo soo magacaabay Ra'iisul-wasaare?
- ✓ Waxaa bishii Maarso 1969kii.
20. Sheeg goortii la dilay Madaxweyne Cabdirashiid Cali Sharmaake?
- ✓ Waxaa la dilay 15kii Oktoobar 1969kii.
21. Sheeg magaaladii lagu dilay Madaxweyne Cabdirashiid Cali Sharmaake?
- ✓ Waxaa lagu dilay Magaalada Laascaanood ee Gobolka Sool.
22. Maxay ku dhiseen siyaasada Soomaaliya maamulkii Rayidka ee 1960 illaa 1969kii?
- ✓ Waxa ay ku dhisneen xisbi badan iyo habka Baarlamaaniga ah.

23. Muxuu madaxweyne Aadan Cadde oo ka hadlayay munaasabadii uu xilka ugu wareejinayay Madaxweyne Cabdirashiid Cali Sharmaake ku faanay?
- ✓ Waxa uu ku faanay, “in uu wareejinayo hoggaan dawlad aan qofna fikir dartiis ugu xirneyn”.
24. Sheeg muddadii ugu nabada iyo degnaanta fiicneed Soomaaliya?
- ✓ Waa muddadii u dhaxeysay xornimada 1960kii, illaa doorashadii Madaxweyne Cabdirashiid 1967dii.
25. Sheeg goortii uu dhacay kacaanka?
- ✓ Kacaanka waxa uu dhacay habeen 21kii Oktoobar 1969kii.

Caharka: 3^{aad} Xilligii hab maamulka Ciidanka

1. Waa maxay kacaan?
 - ✓ Kacaan waa isbeddel saameeya dhinacyadda siyaasadda iyo bulshada horseedna uu ka yahay dadweyne.
2. Waa maxay afgambi?
 - ✓ Afgambi waa koox talada xoog kula wareegta oo gambisa hanaanka maamul ee horay u jiray?
3. Kacaanka kadib taliyaha ciidanka xoogga dalka waxa uu soo dhisay gole sare oo ka kooban 25 saraakiil, haddaba kala sheeg xubnahaas?
 - ✓ Xubnahaas waxa ay kala yihiin:-
 - Maxamed Siyaad Barre.
 - Maxamed Caynaanshe Guuleed
 - Jaamac Cali Qoorsheel
 - Salad Gabayre Kediye.
 - Xuseen Kulmiye Afrax
 - Maxamed Cali Samatar

- Axmed Maxamuud Cadde
- Cabdalla Maxamed Faadil
- Cali Mataan Xaashi
- Bashiir Yuusuf Cilmi
- Maxamuud Mire Muuse
- Axmed Xasan Muuse
- Maxamed Sheekh Cusmaan
- Ismaaciil Cali Abokor
- Maxamed Cali Shire
- Axmed Suleyman Cabdalla
- Maxamuud Geele Yuusuf
- Faarax Wacays Duule
- Muuse Rabiile Good
- Axmed Maxamuud Faarax
- Maxamed Cumar jees
- Cusmaan Maxamed Jeelle
- Cabdi Warsame Isxaaq
- Cabdirisaaq Maxamuud Abuubakar
- Cabdulqaadir Xaaji Maxamed.

4. Goormaa ayuu soo baxay heerkii ugu horeeyay xilliga talada ciidanka?

✓ Waa sannadkii 1979kii.

5. Sheeg sannadkii xubnaha Golaha Sare ee Kacaanka ay bilaabeen loollan dhexdooda ah, kaas oo ku dhammaaday in golihii sare la kala diro, lagana soo reebo 5 xubnood oo la magac baxay Xafiiska Siyaasadda kuwaas oo dalka xukumayay magaca xisbiga Hantiwadaagga?

✓ Waa sannadkii laga bilaabo 1976dii.

6. Sheeg sannadkii uu dhacay Afgembigii dhicisoobay?

- ✓ Waa sannadkii 1978dii.
- 7. Sheeg muddadii u dhaxeesay ay sameysmay jabhado hubaysan oo hannaan beeled u abaabulan u jeeddadoodana tahay in ay talada xoog uga tuuraan ciidanka?
 - ✓ Waa muddadii u dhaxeysay 1978-1989kii.
- 8. Sheeg goortii ay 114 qof oo ka tirsan waxgaradka bulshada ah aya soo saarayn baaq lagu magac daray MAANAFEESTO?
 - ✓ Waa Bishii May 1990kii
- 9. Sheeg sannadkii maamulkii laga aaminbaxay uu isku dayay in uu wax saxo, oo uu soo saaray xeer cusub oo uu ku oggolaaday xisbiyo badan iyo doorashooyin lagamase aqbalin?
 - ✓ Waa sannadkii 1990kii.
- 10. Sheeg muddadii uu kacaanka ku tallaabsaday guulo muuqda?
 - ✓ Waa muddadii 7da sano ahayd ee hore.
- 11. Maxay ahayd sababta u horseeday in uu Kacaanka ku tallaabsaday guulo muuqda?
 - ✓ Sababta waxa ay ahayd iyada oo ay talada gacanta ugu jirtay golaha sare.
- 12. Sheeg sannadkii ee Abaartii Daba Dheer dadkii ay saameysay lasoo raray, lana dejiyay agagaarka webiyada sida Kuturwaaray, Sabaale iyo Dajuuma?
 - ✓ Waa sannadkii 1974tii.
- 13. Goormee ayuu dhacay dagaalkii labaad ee u dhaxayay Itoobiya iyo Soomaaliya?
 - ✓ Waxa uu dhacay sannadkii 1974tii.
- 14. Sheeg waxyaabaha lagu dhaliilay Kacaanka?
 - ✓ Waxyaabaha lagu dhaliilay Kacaanka waxaa ka mid ah:-
 - Laalay dastuurkii iyo xeerarkii dalka.
 - Baabi'iyay dhammaan hay'adihii dastuuriga ahaa.

- Muddo 10 sano ah dalka ku xukumayay wareegto.
- Kala diray golihii sare, kuna beddalay xisbigii hanta wadaagga.
- Ka dhaqan geliyay hantiwadaag bulsho Muslim ah oo aan hanta goosi aqoon.
- Soo saaray xeerkaa qoyska, culimadii diidayna toogtay.
- Soo nooleeyay hannaan beeled in wax lagu xkumo.
- Diiday fekrad kasta oo dalka lagu badbaadin lahaa, dagaal sokeeyena looga hortegi lahaa.

15. Soomaaliya maamulka ciidan hortisa maxay ku dhisneed?

- ✓ Soomaaliya maamulka ciidan hortis taladeedu waxa ay ku dhisnayd in si dimoqraadi ah la isku soo doorto, taas oo awoodda si nabad ah lagula kala wareegi jiray.

16.

17.

Su'aalo & Jawaabo

Cutubka #4 DHAQDHAQAAQYADA XORAYNTA AFRIKA

Caharka: 1^{aad} Dhaqdhaqaaqa Mahdiga Suudaan

1. Maxay ay ka sinnaayeen guud ahaan ururada iyo dhaqdhaqaaqyada xoraynta Afrika?
 - ✓ Waxa ay guud ahaan ururada iyo dhaqdhaqaaqyada xoraynta Afrika ka sinnaayeen, inay u istaagaan xoraynta dhulalkooda ay ka xoraynyaan gumaystaha reer Yurub iyo la dagaalanka midab kala sooca ka jira dalka Koonfur Afrika, kaasoo kala sarraysiinaya bulshada ku nool dalkaas.
2. Maxaa lagu tiriyaa dhaqdhaqaaqii Mahdiga Suudaan ?
 - ✓ Waxaa lagu tiriyaa dhaqdhaqaaqii Mahdiga Suudaan mid ka mid ah kacdoonadii ugu cansanaa taariikhda Suudaan iyo tan Afrika guud ahaan.
3. Goormee dhaqdhaqaaqii Mahdiga Suudaan u istaagay la dagaalanka gumeysiga Ingiriiska?
 - ✓ Waxa uu u istaagay la dagaalanka gumeysiga Ingiriiska dhammaadkii qarnigii 19^{aad}.
4. Kumuu ahaa Dhaqdhaqaaqii ugu horeeyay ee Suudaan u horkaca sidii ay xornimo u heli lahayd?
 - ✓ Waa dhaqdhaqaaqii Mahdiga Suudaan la dagaalanka gumeysiga Ingiriiska.
5. Maxaa keenay in uu soo ifbaxo dhaqdhaqaaqii Mahdiga Suudaan?
6. Waxaa keenay inuu soo ifbaxo dhaqdhaqaaqii Mahdiga Suudaan Xukuumaddii Ingiriiska ayaa waxa ay ku soo rogtay canshuuro tiro badan.
7. Maxaa Mahdiga ka codsaday Odoyaasha qabiilada dega agagaarka Jaziiradda Abba oo u ahayd?

- ✓ Maxaa Mahdiga ka codsaday Odoyaasha qabiilada dega agagaarka Jaziiradda Abba oo u ahayd in ay bayco kula galaan hoggaansanaan iyo Jihaad.
- 8. Kumuu ahaa ninka ugu sareeya maamulka Suudaan?
 - ✓ Maxamed Ra'uuf waa ninka ugu sareeya maamulka Suudaan
- 9. Yaa hoggaaminayay ciidamada uu Ra'uuf u diray Mahdiga si ay ula dagaalaan?
 - ✓ Waxaa hoggaaminayay Abuu Sacuud.
- 10. Goormee ayay dhacday dhacdii ugu horeesay ee dhex marta maamulka Khartumm iyo Mahdiga?
 - ✓ Waxa ay ahayd sannadkii 1881dii.
- 11. Maxay Mas'uuliintii Qaahira oo maamulka Khartuum uu hoos tagayay u arkeen sababta guuldaradda Maxamed Ra'uuf?
 - ✓ Mas'uuliintii Qaahira oo maamulka Khartuum uu hoos tagayay waxa ay u arkeen sababta guuldaradda ay tahay jillicsanaanta Maxamed Ra'uuf taas oo keentay in xilka laga qaado.
- 12. Markii xilka laga qaaday Maxamed Ra'uuf yaa lagu badalay?
 - ✓ Waxaa lagu badalay Cabdulqaadir oo joogay Qaahira.
- 13. Yaa ku sime u ahaa Cabdulqaadir jagadisa inta uu ka imaanayo?
 - ✓ Waxaa ku sime u ahaa Jaqlar.
- 14. Yaa hoggaaminayay ciidamada dagaalkii labaad ee lagu qaaday Mahdiga?
 - ✓ Waxaa hoggaaminayay Yuusuf Shallaali.
- 15. Yaa guuleystay ciidamii Mahdiga iyo kuwii Yuusuf Shallaali?
 - ✓ Waxaa guuleystay Mahdiga.
- 16. Immisa ciidan ayay gaarayeen ciidamada uu Yuusuf Shallaali hoggaaminayay si ay ula dagaalamaan Mahdiga?
- 17. Waxa ay gaarayeen 300 oo askari.

18. Goormee ayay ahayd markii ciidamadii labaad ee la diray oo uu hoggaaminayay Yuusuf Shallaali kasso ka dhaqaaqay Khartuum?
- ✓ Waxa ay ahayd bartimihii Bishii May 1882dii.
19. Muxuu u diray Yuusuf Shallaal Mahdiga marka uu u dhowaaday?
- ✓ Waxa uu u diray warqad hanjabaad iyo niyad jabin ah.
20. Mahdiga muxuu ugu jawaabay Yuusuf Shallaali warqadii uu u soo diray?
- ✓ Mahdiga dhankiisa waxa uu ku jawaabay, “ annagu kuuma hayno wax aan ahayn waran iyo seef af badb”.
21. Goormuu bilowday dagaalkii u dhaxeeyay labada dhinac Mahdiga iyo Maxamed Saciid oo ahaa maamulaha deegaanka Ubayad?
- ✓ Waxa uubilowday 8dii Sibtember 1882di.
22. Yaa ku jabay dagaalkii u dhaxeeyay Mahdiga iyo Maxamed Saciid oo ahaa maamulaha deegaanka Ubayad?
- ✓ Waxaa halkaas ku jabay ciidankii Mahdiga.
23. Immisa ciidan ayaa laga dilay Mahdiga ciidamadiisa dagaalkii u dhaxeeyay Asiga iyo Maxamed Saciid oo ahaa maamulaha deegaanka Ubayad?
- ✓ Waxaa looga dilay Mahdiga 10 kun oo ciidan.
24. Kumuu ahaa Amiirka bariga Suudaan?
- ✓ Amiirka bariga Suudaan waxa uu ahaa Cusmaan Diqni.
25. Goormee ayuu Gaardan soo gaaray Magaalada Khartuum?
- ✓ Goordan waxa uu soo gaaray Khartuum 18^{dii} Febraayo 1884^{tii}.
26. Yaa hoggaaminayay ciidamada Ingiriiska dhabar jabintii ee ugu horreysay taariikh ahaan?
- ✓ Waxaa hoggaaminayay Janaraal Faltiin Biikar.
27. Goormee ayay ahayd dhabar jabintii Ingiriiska ee ugu horreysay taariikh ahaan?
- ✓ Waxa ay ahayd markii Mahdiga ka guuleystay.

28.Goordan maxaa uu u magacaabay Mahdiga?

- ✓ Waxa uu u magacaabay Mahdiga inuu yahay guddoomiyaha gobolka Kurdufaan.

29.Maxaa uu Goordan u soo diray Mahdiga?

- ✓ Waxa uu ugu soo diray hadiyad qaali ah oo dhar ah.

30.Maxaa uu ku sameeyay Mahdiga hadiyadii uu u soo diray Goordan?

- ✓ Mahdiga wuu ku soo celiyay hadiyadii, waxa uuna Goordan ugu yeeray in uu soo galo diinta Islaamka.

31.Markii uu bilaabay in uu go'doomiyo Mahdiga magaalada Khartuum yaa uu u xil saaray in ay hoggaamiyaan?

- ✓ Waxa uu u xil saaray in ay hoggaaminayaan Cubayd iyo Abuu Canja.

32.Intee ayay ka dagaal galayeen ciidamada uu hoggaaminayay Abuu Canja?

- ✓ Ciidankii Abuu Canja hoggaaminayay waxay ka dagaal galayeen Aagga Jireefta Galbeed- oo hadda ka mid ah xaafadaha Khartuum.

33.Maxaa loogu magac daray Najuumi?

- ✓ Najuumi waxaa loogu magac daray Amiirka Amiirada ee go'doominta Khartuum.

34.Halkee ayuu dagay Mahdiga markii uu ciidankii uu hoggaaminayay u soo dhaqaajiyay dhanka Khartuum?

- ✓ Waxa uu dagay deegaanka Deem Abuu Sacda.

35.Goormee ayuu dhintay Mahdiga?

- ✓ Mahdiga waxa uu dhintay 6 bil kadib markii ay Goordan dileen magaalada Khartuumna xor noqotay.

36.Kumuu ahaa Khaliifkii Mahdiga?

- ✓ Khaliifkii Mahdiga waxa uu ahaa Cabdullaahi Tacaashii.

37.Yaa badalay Mahdiga markii uu dhintay?

- ✓ Mahdiga waxaaa badalay markii uu dhintay kadib Khaliifkiisii Cabdullaahi Tacaashii.
- 38.**Goormee ayay socdeen dagaalo goos goos ah oo ka dhaca Soohdinta?
- ✓ Waxay socdeen dagaalo goos goos ah oo ka dhaca Soohdinta intii u dhaxeysay 1885-1891kii.
- 39.**Yaa ka hor yimaaday go'aankii Ingiriiska oo ahaa diyaarintii dagaal in lagu qaado Suudaan?
- ✓ Waxaa ka hor yimaaday fikirkaas Khideewiga Masar iyo Wadniyiin kale, sidoo kalena Sanduuqa deynta Masarna uu diiday in uu bixiyo Kharashka dagaalkaas.
- 40.**Immisa ayay gaarayeen ciidankii uu hoggaaminayay Herbert Kitchener?
- ✓ Waxa ay gaarayeen 8200 igiriis ah iyo 20,000 oo isugu jira Masari iyo Suudaan.
- 41.**Maxamed Axmed intee ayuu dagaal kula galay Ingiriiska?
- ✓ Waxa uu dagaal kula galay kuma guuleysan in hor istaago Ingiriiska degaanka Cadbara.
- 42.**Goormee ayay ahayd markii uu dagaal kula galaayay Maxamed Axmed Ingiriiska deegaanka Cadbara?
- ✓ Waxa ay ahayd 8^{dii} Abril 1898^{dii}.
- 43.**Immisa Suudaan ayaa ku dhimatay haddana ku dhawacmay dagaalkii u dhaxeeyay Maxamed Axmed iyo Ingiriiska?
- ✓ Waxaa ku dhimatay 3 kun oo Suudaan ah, waxaana ku dhaawacmay 4 kun oo kale.
- 44.**Intee ayaa loo taxaabay oo lagu xiray Maxamed Axmed?
- ✓ Waxaa loo taxaabay oo lgau xiray Maxamed Axmed Xabsiga Rashiid oo ku yaala Masar, kasoo uu ku dhintay dhowr sanno kadib jabkii Cadbara

45. Goormee ayay ahayd markii Tacaashi ka dagaalamayay goobta la yiraahdo Karaari?
- ✓ Waxa ay ahayd 2^{dii} Sibtember 1898^{dii}
46. Immisa ayaa ka dhimatay haddana ka dhaawacmatay ciidankii uu hoggaaminayay Tacaashi?
- ✓ Waxa ka dhimatay 10 kun, iyo ku dhawaad 6 iyo 10 kun oo dhaawac ah.
47. Goormee ayuu dhacay dagaalkii Umu Duwaykaraat ee u dhaxeeyay Ingiriiska iyo Tacaashi?
- ✓ Waxa uu dhacay 24^{tii} Nofenber 1899^{kii}
48. Intee ayuu ku dhintay Tacaashi?
- ✓ Tacaashi waxa uu ku dhintay salligii uu ku tukanayay korkiis.

Caharka: 2^{aad} Dhaqdhaqaaqii Sanuusiyaada (Cumar Mukhtar)

1. Goormee ayuu dhashay Cumar Mukhtar?
- ✓ Cumar Mukhtar waxa uu dhashay sannadka marka uu ahaa 1862^{dii}.
2. Halkee ayuu ku dhashay Cumar Mukhtar?
- ✓ Cumar Mukhtar waxa uu ku dhashay tuulada Janzuur eek u taal Bariga Liibaya.s
3. Qabiilkee ayuu ka soo jeedaa Cumar Mukhtar?
- ✓ Cumar Mukhtar waxa uu kasoo jeedaa qabiilka la yiraahdo Manfa oo ka mid ah qabiilada ugu waaweyn bariga Liibiya.
4. Maxaa ku barbaaray Cumar Mukhtar?
- ✓ Cumar Mukhtar waxa uu ku barbaaray agoonnimo.
5. Goormee ayuu dhintay Cumar Mukhtar aabihiis?
- ✓ Cumar Mukhtar aabihiis waxa uu dhintay isaga oo Xaji u socda.
6. Yaa soo koriyay Cumar Mukhtar markii uu aabihiis dhintay kadib?

- ✓ Waxaa soo koriyay guddoomiyihii magaalada uu ku dhashay.
7. Maxaa uu guddoomiyihii magaalada u soo koriyay Cumar Mukhtar?
- ✓ Maxaayeelay waxaa kula dardaarmay Aabihiis in uu koriyo.
8. Markii uu Qur'aanka bartay oo uu xifdayay halkee ayuu u safray Cumar Mukhtar?
- ✓ Waxa uu u safray Waaxada Jacbuub, taas oo xilligaas ahayd magaalada madaxda Sunuusiyaanta oo ku taalay bariga Liibiya.
9. Immisa sano ayay ku qaadatay Cumar Mukhtar waxbarashadiisii uu ku baranayay culuumta shareecada eek ala duwan, sida fiqiga, xadiiska, Tafsiiirka iyo kuwa kale?
- ✓ Waxa ay ku qaadatay muddo 8 sano ah.
10. Muxu ahaa Cumar Mukhtar markiisii horay?
- ✓ Cumar Mukhtar markiisii horay waxa uu ahaa nin dadka wacdiyo oo diinta u sheega.
11. Markii uu gumaystaha yimid maxaa uu sameeyay Cumar Mukhtar?
- ✓ Markii uu gumaystaha yimid Cumar Mukhtar waxa uu ku biiray dadkii u istaagay la dagaalanka cadawga.
12. Goormuu dhacay dagaalkii uu Ingiriiska ku qabsaday deegaanka Masar iyo Saluuma?
- ✓ Waxa uu dhacay dagaalkaas 1908dii.
13. Intee ayuu ku dhex maray dagaalkii u dhaxeeyay Sanuusiyaanta iyo Faransiiska oo uu Cumar Mukhtar ka qeyb galay?
- ✓ Waxa uu ku dhex maray deegaanka koonfureed iyo markii uu soo galay dalka Jaad 1900kii.
14. Goormee ayuu dhex maray dagaalkii Axmed Shariif iyo Ingiriiska kaas uu Cumar Mukhtar ka weyb galay?
- ✓ Waxa uu dhex maray sannadkii 1915tii.

15. Yaa hoggaaminayay dagaalkii ka dhacay deegaanka Barqa?
- ✓ Cumar Mukhtaar ayaa hoggaaminayay dagaalkii ka dhacay deegaanka Barqa.
16. Goormee ayuu bilowday halgankii Cumar Mukhtaar ee uu kula jiray Talyaaniga?
- ✓ Waxa uu bilowday 1911kii kadib markii uu soo dagay magaalada Bingaazi.
17. Halkee ayay ku taalaa magaalada Kafra?
- ✓ Waxa ay ku taalaa bartamaha lama degaanka.
18. Immisa Kiloomitir ayay u jirtaa Biniin magaalada Bingaazi dhanka koonfur?
- ✓ Waxa ay u jirtaa 20 km dhanka koonfur.
19. Halkee ayuu ka dhigtay saldhig Cumar Mukhtaar kaas uu si joogta ah ugu duuli jiray Talyaaniga?
- ✓ Waxa uu saldhig ka dhigtay Biniin.
20. Goormuu dhacay dagaalkii uu hoggaaminayay Cumar Mukhtaar kaas oo socday laba maalmood uu kula dagaalmayay Talyaaniga?
- ✓ Waxa uu dhacay 16kii May 1913dii.s
21. Cumar Mukhtaar immisa ciidan ayuu kaga dilay Talyaaniga dagaalkii dhacay 16kii May 1913dii?
- ✓ Waxa uu Talyaaniga kaga dilay 70 askari oo uuna kaga dhaawacay 400 oo kale.
22. Goormuu dhacay weerarkii Buu Shimaal oo uu qaaday Cumar Mukhtaar?
- ✓ Waxa uu dhacay 6dii Oktoobar 1913dii.s
23. Intee ayuu ka dhacay weerarkii Buu Shimaal ee uu qaaday Cumar Mukhtaar?
- ✓ Waxa uu ka dhacay deegaanka Cayn Maara.
24. Immiso weerar ayuu qaaday Bishii Febraayo ee sannadkii 1914tii?

- ✓ Waxa uu qaaday saddex weerar, oo uu ka mid yahay kii ka dhacay Umu Shakhnab iyo Shaltiima.

25. Halkee ayuu Cumar Mukhtaar ka weerari jiray Talyaaniga?

- ✓ Waxa uu ka weerari jiray deegaanada Zaawiyata Qusuur iyo Taknas.

26. Goormee ayay gacanta cadowga gashay deegaanada Zaawiyata Qusuur iyo Taknas?

- ✓ Waxa ay gacanta cadowga gashay Bishi Sibtember sannadkii 1913dii.

27. Markii gacanta cadowga gashay deegaanada Zaawiyata Qusuur iyo Taknas uu ka weerari jiray Talyaaniga halkee ayuu u wareegsaday Cumar Mukhtaar oo uu saldhig ka dhigtay?

- ✓ Waxa uu u waregay saldhigyada Buurta Cubayd, xiriirna la sameen jiray qabiilada Difna.

28. Maxay ahayd sababta keentay in iska caabinata guumeysiga uu hoggaminayay Cumar Mukhtaar hoos-u dhac uu ku yimaado?

- ✓ Sababta waxa ay ahayd abaaro sameeyay dalka muddadii u dhaxeeyay 1913-1915tii, waxaana u sii dheeraa Talyaaniga oo qabsaday deegaano muhiim ah sida bartamaha iyo waqooyiga Magaalada Barqa?

29. Goormee ayuu Talyaaniga qabsaday Magaalada Barqa?

- ✓ Waxa uu qabsaday Bishii Luulyo 1914tii.

30. Maxay ahyd qaabkii uu isticmaali jiray Cumar Mukhtaar?

- ✓ Cumar Mukhtaar waxa uu isticmaali jiray qaab ku dhufo ka dhaqaaq ah.

31. Immisa nin ayuu galin jiray Cumar Mukhtaar dagaalyahana?

- ✓ Waxa uu galin jiray halkii dagaalba inta u dhaxeysa 100-300 nin, kama badin jirin 1000 nin.

32. Immisa sanno ayay socdeen dagaaladii dhex maray ee adkaa Cumar Mukhtaar iyo Talyaaniga?

- ✓ Waxa ay socdeen muddo dhan 22 sano.

33. Maxaa ku yiilay deegaanka Jabal Akhdar?

- ✓ Deegaanka Jabal Akhdar waxaa ku yaalay dhul godan oo hawd ah, aadna kaymo badan kuna adag tahay dagaalyahanada in ay maraan.

34. Goormee ayay gacanta ku dhigeen Talyaaniga Cumar Mukhtaar?

- ✓ Waxa ay gacanta ku dhigeen 11^{kii} Sibtember 1931^{dii}.

35. Maxay ahayd u jeedada qaab dileedka Cumar Mukhtaar?

- ✓ U jeedada qaab dileedka Cumar Mukhtaar waxa ay ahayd in lagu niyad jabiyo halgamayaasha.

36. Goormee ayaa laga saaray Talyaaniga dalka Liibiya?

- ✓ Waxaa laga saaray sannadkii 1943^{dii}.

37. Waxaa aad sheegtaa oraahyadii uu ka tagay Cumar Mukhtaar oo ka qalisan dahabka oo aan lagu qiimayn Karin maal, kuwaas oo uu ku dhawaaqay dhacdooyin kala duwan?

- ✓ Oraahyadaas waxaa ka mid ah:-
 - “Annagu is dhiibi mayno, waana guulaysanaynaa ama waan dhimanaynaa”
 - “Dulmiga waxa uu ka dhigaa qofka la dulmiyay halyeey, balse dambigu waxa uu dambiiluhu ka dhigaa qof fulay ah oo wadnihiisu cabsi galiiriy; si kasta oo uu dambiiluhu isu adkeeyo una muujiyo isla weyni”.
 - “Way na jebin karaan haddii ay na niyad jebiyaan, waxaanse aaminsanahay in aan xor ahay oo aan xaq u leeyahay in aan six or ah ugu noolaado dalkeyga, limaankaasna waxa uu ka xoog badan yahay hubka”.
 - “Waxa aad la dagaallami doontaan jiilka soo socda iyo midka ka dambeeya. Waxa aadna ogaataa in noolashaydu ay ka dheer tahay mid i daldalaya”.

- “Xukun waa kii Eebbe ee ma aha kiina dhalanteedka ah. Inna Lillaahi wa Inna Ilayhi Raajicuun”. Waxa uu ku dhawaaqay markii uu maqlay xukunkii daldalaadda.

Caharka: 3^{aad} Dhaqdhaqaaqii Azhar ee ka soo hor jeeday Faransiiska

1. Goormee ayuu Faransiisku yimaaday Masar?
 - ✓ Faransiisku waxa uu yimaaday Masar 1dii Luulyo 1798dii.
2. Halkee ayay ahayd meesha laga abaabulo Kacdoonka ka soo horjeeda Faransiiska?
 - ✓ Waxa ay ahayd meeshaas Azhar.
3. Kumuu ahaa Guddoomiyaha Asharaafta xilligii Kacdoonka Masar?
 - ✓ Sheikh Cumar Makram ayaa ahaa Guddoomiyaha Asharaafta.
4. Kumuu ahaa hoggaamiyihii dullaanka Faransiiska?
 - ✓ Hoggaamiyihii duullaanka Faransiiska waxa uu ahaa Naabilyoon Bonabaarte.
5. Goormee ayay Naabilyoon Bonabaarte ku guuleystay dagaalkii ka dhacay Imbaaba oo ku taal degmada Jiiza?
 - ✓ Waa 21dii Luuliyo 1798dii.
6. Halkee ayay ahayd saldhiga Faransiiska?
 - ✓ Waxaa saldhig u ahaa Faransiiska degmada Jiiza.
7. Goormee ayuu Naabilyoon Bonabaarte soo galay magaalada Qaahira?
 - ✓ Waxa uu soo galay 24tii Luuliyo 1798dii.
8. Maxay u sheegeen Naabilyoon Bonabaarte Ergadii ay soo direen culimadii Azhar iyo waxgaradkii?
9. Waxa ay u sheegeen Naabilyoon Bonabaarte, “ waxa aan kaa rabnaa nabadgalyo iyo xasilooni”.

10. Maxaa uu ugu jawaabay Naabilyoon Bonabaarte Ergadii ay soo direen culimadii Azhar iyo waxgaradkii?
11. Waxa uuna ugu jawaabay, “ annagu waxa aan idin soo dirnay dhambaal mar hore oo wax walba ay ku qornaayeen, waxaana ku sheegay in aan u nimid in aan tirtirno Mamaaliigta kuwaas oo si xaqiraad iyo dullinimo ah noola dhaqmay markaas berriga u soo degnay way noo soo baxeen waxaana marinay mudankood. Annagoo qaar dilnay qaarna qaqaqbannay. Laakiinse culimada iyo dadka maqaamka leh, waxa ay guryahooda ku joogayaan si nab galyo iyo degganaan ah”.
12. Maxaa kale oo uu soo raaciyay Naabilyoon Ergadii?
- ✓ Naabilyoon Ergadii waxa uu soo raaciyay farriin uu kaga dalbanayo in ay u yimaadaan culimada waaweyn, waxa uuna yiri, “ waxaa laga maaarmaan ah in ay culimada noo yimaadaan, si aan u samayno gole ka kooban 7 qof oo waxgarad, oo na maamula”.
13. Maxaa uu Suldaankii Cusmaaniyiinta ee Saliimkii 3aad u soo diray Culimada Azhar iyo ardaydooduba?
- ✓ Waxa uu u soo diray qoraal dhiira galin ah oo uu ugu yeerayo dadka Masar in ay la dagaalmaan culimada Faransiiska.
14. Goormee ayuu Ibraahim Beek soo diray dhambaal ku socda culimada Azhar iyo ardaydooda oo ugu bishaaraynayo in uu ku soo fool leeyahay ciidan uu soo diray Suldaanka?
- ✓ Waxa ay ahayd 13kii Sibtember.
15. Goormee ayuu dhacay dhaqdhaqaaqii ugu horeeyay ee Masar kaga horyimaadeen Faransiiska?
- ✓ Waxa uu dhacay 21dii Oktoobar 1798dii.
16. Halkee ayuu ka bilowday dhaqdhaqaaqii ugu horeeyay ee Masar kaga horyimaadeen Faransiiska?

- ✓ Waxa uu ka bilowday agagaarka Masjidka Azhar, oo ahaa saldhigga guud ee Kacdoonka, iyada oo culimada u istaageen Diyaarintiisa.

17.Immisa nin ayay gaarayeen guddiga kacdoonka Masar maxaana loogu daray?

- ✓ Waxa ay gaarayeen 100 nin waxaana loogu daray Guddiga Shirqool.

18.Immisa qof ayay gaarayeen dadkii kacdoonsanaa ee isugu yimid Azhar?

- ✓ Waxa ay gaarayeen 15000 qof oo isugu jira arday iyo dadka deggan Qaahira.

19.Immisa qof ayaa ku dhimatay dagaalkii u dhaxeeyay Masar iyo Faransiiska?

- ✓ Waxaa ku dhimtay 4 kun oo qof.

20.Goormaa ayay ahayd markii uu Azhar u diray wafdi Naabilyoon oo kaga dalbanayo nabd, iyo in cabsida dayso dadka?

- ✓ Waxa ay ahayd 24kii Oktoobar 1798dii.

21.Yaa ka mid ahaa Culumadii uu maxkamadeeyay Gumeystihii Faransiiska oo uu hoggaaminayay Naabilyoon?

- ✓ Waxaa ka mid ahaa culimadaas:-

- Sheikh Ismaaciil Baraaqi.
- Cabdulwahaab Shabraawi.
- Yuusuf Musalixi.
- Sulaymaan Joosqi.

22.Goormee ayaa la saaray maxakamadii qarsoodiga aheed oo ku xukuntay dil culimadii Sheikh Ismaaciil Baraaqi, Cabdulwahaab Shabraawi, Yuusuf Musalixi , Sulaymaan Joosqi kuwa kale?

- ✓ Waxa ay ahayd 3dii Nofenber 1798dii, oo maalintii xigaytayna lagu fuliyay dilkii barxadda Qalcada.

23.Goormuu dhacay kacdoonkii 2aad ee Qaahira?

- ✓ Waxa uu dhacay 20kii Maarso 1800kii.

24. Goormaa ayay ahayd markii uu Suleymaan iska soo dhigay nin tuugsanaya ee uu yimid beerta nasashada ee guriga Kaliibar?
- ✓ Waxa ay ahayd 14kii Juun 1800.
25. Immsa sano jir ayuu ahaa Suleymaan markii la xukumayay?
- ✓ Waxa ay da'diisa ka yareed 20 sanno.
26. Goormaa ayaa maxkamada la saaray Suleymaan?
- ✓ Waxaa maxkamada la saaray Suleymaan 28dii Juun 1800kii.
27. Goormaa ayay ahayd markii maamulkii Azhar go'aansadeen in la joojiyo waxbarshada lana xiro masjidka, xaaladda jiro aawgeed?
- ✓ Waxa uu go'aan dhaqan galay 22kii Juun 1800kii.
28. Immisa sano ayuu xirnaa Masjidka AZhar?
- ✓ Waxa uu xirnaa sannad waxbarasheed.
29. Goormee ayaa dib loo furay Masjid Azhar?
- ✓ Waxaa dib loo furay 2dii Luuliyo 1801dii.

Caharka: 4^{aad} Dhaqdhaqaaqa Xoraynta Koonfur Afrika

1. Jamhuuriyada Midowga Koonfur Afrika maxay ahayd?
 - ✓ Jamhuuriyada Midowga Koonfur Afrika waxay ahayd mid ka mid ah tusaalayaasha ugu foosha xun dunida eek u dhisan midab kala sooca.
2. Immisa caddaan iyo madow ayaa ku noolaa Jamhuuriyada Midowga Koonfur Afrika
 - ✓ Waxaa ku noolaa 5 malyan oo caddaan ah oo xukumayay ku dhawaad 29 malyan oo madow ah.
3. Muxuu waayay Midowga Koonfur Afrika inta uusan dhalanin kahor?

- ✓ Waxa uu waayay wada jirkiisa inta uusan dhalanin ka hor, kaasoo noqotay Jannada intii yarayd oo cadaabta unta badan, ahna saldhiga midab kala sooca.
4. Maxay ahayd siyaasada ay raaceen Jamhuuriyada Midowga Koonfur Afrika?
- ✓ Waxa ay raaceen siyaasad ku dhisan in la gumaysto inta badan, oo lagu hayo deegaanno sabool iyo abaar ah iyo weliba in laga dhigto adeegayaal.
5. Goormaa ayay ahayd markii ururka Qaramada Midoobay ay soo saareen go'aanno dhawr ah, kuwaas oo lagu go'doominayo Midowga Koonfur Afrika?
- ✓ Waxa ayay ahayd sannadkii 1962dii iyo sannadihii ka dambeeyay.
6. Yaa kale oo xiriirka u jaray Koonfur Afrika?
- ✓ Waxaa kale oo xiriirka u jaray Koonfur Afrika dawladaha dunida saddexaad, mid kala sooca awgiis.
7. Immisa kooxood ayay u qaybsamaa Koonfur Afrika marka laga fiiriyo nidaamka midab kala sooca?
- ✓ Waxa ay u qeybsamaa laba kooxood.
8. Maxay kala yihiin laba kooxood ay u qaybsamaa Koonfur Afrika marka laga fiiriyo nidaamka midab kala sooca
- ✓ Waxa ay kala yihiin:-
 - Caddaan tiradooda lagu qiyaaso 5 malyan.
 - Dadka aan caddaanka ahayn, oo ah Baantuuga (degaanka asalka ah) oo lgau qiyaaso 24 malyan iyo 4 malyan oo ah iska dhal iyo aasiyaan ah, waxaana lagu qiyaasaa isku darkooda 29 malyan.
9. Caddaanka degnaa Koonfur Afrika muxuu ka koobnaa?
- ✓ Cadaaanka waxa uu ka koobnaa Hooland, Jarmal, Ingiriis iyo Faransiis, waxa ayna isku magacaabeen Afrikaanis, oo ay noqdeen isir cusb,

waxayna ku hadlaan af isku dar ah oo isugu jira Ingiriis, Jarmal iyo Holand.

10. Maxay ka koobanyihiin Afrikaanka oo ah dadka ugu badan ee dega Koonfur Afrika?

- ✓ Afrikaanka oo ah dadka ugu badan ee dega Koonfur Afrika waxa ay ka koobna yihiin qaybo dhawr ah sida:
 - qaybta 1aad waa qabiilada, Iswaazi, Zuuluu oo laga baqi jiray inta uusan imaanin gumaysiga reer Yurub.
 - Qeybta 2aadna waa qabiilada Tuusoonga, Ranga, Tuswa iyo 2da qabiil eek ala ah Fanda iyo Suutuu oo dhammaantood la yiraahdo Zuuluu.
 - Isirka kale ee daga Koonfur Afrika waxaa la yiraahdaa iska dhalka oo kula qeybsama dad ka beermay is guursiga cadaanka iyo Afrikaanka, iyo kuwa kale oo ka bermay is guursiga cadaanka iyo aasiyaanka.
 - Qeybta 3aad oo ah Aasiyaankii u soo guuray Koonfur Afrika kana yimid Baakistaan, Maleesiya iyo Hindiya.

11. Goormee ayuu baahiyay Ururka ANC in uu qaadici doono olole uu u adeegsanayo habab kala duwan?

- ✓ Waxa ay ahyd sannadkii 1952dii.

12. Intee ayuu socday ololaha la dagaalanka midab kala sooca dhanka waxbarashada?

- ✓ Waxa uu socday inta u dhaxeesay 1953 – 1955tii.

13. Goormee ayay ahayd dhaqdhaqaaqii la dagaalanka midab kala sooca ee ka jiray Koonfur Afrika?

- ✓ Waxaa ay ahayd Kontameeyadii qarnigii 20^{aad}.

14. Yaa hoggaaminayay Uruka ANC?

- ✓ Ururka ANC waxaa hoggaaminayay Nelson Mandeela.
- 15.Goormee ayay ka dhacday Koonfur Afrika doorashadii ugu horeesay oo ka madax-bannaan midab kala sooc iyo Immisa qof ayaa codeesay?
- ✓ Waxa ay ka dhacday Bishii Abril Sannadkii 1994tii, waxaana codeesay 86%.
- 16.Goormee ayuu fariistay Golihii Shacabka ee cusbaa ee Koonfur Afrika?
- ✓ Waxa uu fariistay sannadkii 1994tii.
- 17.Goormee ayaa la aasaasay Ururka ANC?
- ✓ Waxaa Ururka ANC la aasaasay 8dii Janaayo sannadkii 1912dii.
- 18.Maxaa uu la magac baxay Ururka ANC markii la aasaasay?
- ✓ Waxa uu la magac baxay Golaha Waddaniga ee Koonfur Afrika.
- 19.Maxay ahayd ujeedada Ururka ANC?
- ✓ Ujeedadiisa waxa ay ahayd Ururka ANC gaarsiinta xukuumada codka Afrikaanka oo ay culays ku saaraan sidii loo heli lahaa xuquuqda Afrikaanka.
- 20.Goormee ayuu Ururka ANC can ku noqday magacaan?
- ✓ Waxa uu caan ku noqday sannadka marka uu aha 1923dii.
- 21.Kumuu ahaa madaxii ugu horeeyay ee Ururka ANC?
- ✓ Waxa uu ahaa Joon Dob.
- 22.Yaa ka mid ahaa xubnihii aasaasay Ururka ANC?
- ✓ Waxaa ka mid ahaa gabayaagii, ahaanna qoraa Sool Balaatij.
- 23.Maxaa loogu magac daray garab militarigii ay sameesay Ururka ANC?
- ✓ Waxaa loogu magac daray militarigii aya sameesay Ururka ANC Warankii Ummadda.
- 24.Goormee ayay Ururka ANC ay sameesay garab militarigii oo loogu daray Warankii Ummadda?
- ✓ Waa sannadkii 1961dii.

25. Goormee ayuu madax ka noqday Abert Joon Lotli Ururka ANC?
- ✓ Waxa uu madax ka noqday intii u dhaxeesay 1951-1958dii.
26. Goormee ayay ahayd markii uu Ururka ANC abaabulay bannaanbaxyo uu boliska dadka u adeegsaday rasaas magaalada Shaelefiill oo u dhow Johanisberg?
- ✓ Waxa ay ahayd sannadkii 1960kii.
27. Goormee ayuu Nelson Mandeela uu noqday hoggaamiyihii ugu horeeyay garabka hubaysan ee Ururka ANC?
- ✓ Waxa uu noqday sannadkii 1961dii.
28. Goormee la maxkamadeeyay Nelson Mandela iyo Walter Sisiilo iyo kuwa kale oo ahaa hoggaamiyayaasha garabka Ururka ANC?
- ✓ Waxa ay ahayd sannadkii 1964tii.
29. Halkee ayaa lagu maxkamadeeyay Nelson Mandela iyo Walter Sisiilo iyo kuwa kale oo ahaa hoggaamiyayaasha garabka Ururka ANC?
- ✓ Waxaa lagu maxkamadeeyay Rifoniya sannadkii 1964tii.
30. Goormee ayuu Mandela ku biiray Ururka ANC?
- ✓ Waxa uu ku biiray sannadkii 1942dii.
31. Goormee ayuu Xisbiga Qowmiga ku guuleystay doorashada guud?
- ✓ Waxa uu ku guuleystay sannadkii 1948dii.
32. Goormee ayaa la xiray oo xabsiga la dhigay Mandeela?
- ✓ Mandeela waxaa la xiray oo xabsiga la dhigay saandkii 1961dii.
33. Goormee ayaa la qabtay Mandeela oo lagu xukumay 5 sano isagoo lagu eedeeyay socdaal sharci darro ah iyo qorshaynta shaqo joojin?
- ✓ Waxaa laqabtay Bishii Agoosto 1962dii.
34. Goormee ayay ahayd Mandeela markii kale oo lagu xukumay xabsi daa'din isaga oo lagu eedeeyay qorshaynta hawlo hubaysan?
- ✓ Waxa ay ahayd sannadkii 1964tii.

35. Immisa sano ayuu xabsiga ku jiray Mandeela markii ay soo baxeesay baaq ah in la sii daayo?
- ✓ Waxa uu xabsiga ku jiray 27^{da} sano.
36. Goormee ayay ahayd markii uu awood u helay Mandeela in uu fariin usoo diro Golaha Qaranka Afrika?
- ✓ Waxa ay ahayd Bishii Juun 1980kii.
37. Maxaa uu ku yiri Mandeela Golaha Qaranka Afrika?
- ✓ Waxa uu ku yiri, “midooba, diyaar garooba, ku dagaallama inta u dhaxeeya bannaanbax iyo iska cabin hubeysan, waxa aan burburin doonnaa midab-kala-sooca”.
38. Goormaa ayay ahayd markii Mandeela loo soo bandhigay in uu xabsiga ku beddesho joojinta iska caabinta hubaysan?
- ✓ Waxa ay ahayd sannadkii 1985tii.
39. Goormee ayuu xabsiga kasoo baxay Mandeela?
- ✓ Mandeela waxa uu xabsiga kasoo baxay 11^{kii} Febraayo 1990^{kii}.
40. Yaa amar ku bxiyay in lasii daayo Mandeela?
- ✓ Waxaa lagu sii daayay amarka madaxweynihii xilligaas oo ahaa Dekalark.